

Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)

Hab-xukunku Degaan ee Habboon iyo Barnaamijka
Tababarka Hoggaamineed

DHISIDDA AWOODDA

URURRADA AAN XUKUUMIGA
AHAYN IYO KUWA BULSHADA KU SALAYSAN
EE FIDI TAANKA URUR AHAANEED

QAYBTA 1aad

FIGRADO IYO ISTARAATEJIYADO



UN-HABITAT



European Commission

**DHISIDDA AWOODDA
URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA
BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA
URUR AHAANEED**

QAYBTA 1aad

FIGRADO IYO ISTARAATEJIYADO

TUSMADA BUUGGA

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO
KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO
KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

AQOONSI	03
GOGOL-DHIG	04
CUTUBKA 1aad	07
CUTUBKA 2aad	11
CUTUBKA 3aad	29
CUTUBKA 4aad	41
Erey-bixin	59

AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee “dhisidda awoodda ururrada aan xukuumiga ahayn iyo kuwa bulshada ku salaysan ee fiditaanka urur ahaaneed” waxay ku hirgashay Barnaamajka Ismaamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay Komishanka Yurub (EU), isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda af Soomaaliga ah ee buugan waxa ka hawl-galay Mr. Ciise Axmad Nuur. waxa dib u habayn ku sameeyay Mr. Mohamed Farah Warsame (Gafote) oo tifaftirka ku xeel dheer. Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Degsiimaha Aadamaha (UN-HABITAT) laanta Hargeysa ku taal ayaa gacan ka gaysatay hirgelinta hawshan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhistada iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

This manual is part of a series that was published by the UN-HABITAT Training and Capacity Building Branch (TCBB) for ‘capacity building of NGOs and CBOs’ and ‘Building Bridges between local governments and citizens’. As part of the ‘Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)’, these manuals were translated into Somali and adapted to the Somali context. The GLTP was funded by the European Commission and implemented by UN-HABITAT under the Regional Office for Africa and Arab States (ROAAS) between July 2003 and June 2005. More information on this project can be found at www.unhabitat.org/roaas.

GOGOL-DHIG

Silsiladdan oo ah buug-hawleedyo tababar, oo loogu talagalay, dhismaha awoodda ururrada aan dawliga ahayn, ayaa waxa loogu talagalay in kor loogu qaado maaraynta guud ahaaneed iyo wax-tarkooda dhinaca shaqada. silsiladdani waxa ay ku soo hagaagtay dib-u-habaynta iyo kor u qaadista Xarunta Ummadaha Midoobay ee Deegaamada Aadamaha (UNCHS) oo laga dhigay barnaamij dhamaystiran oo isla markiina loo yaqaano barnaamijka Ummadaha Midoobey ee deegaamada kaasi oo isla markiina loo bixiyay UN HABITAT, dib-u-habaynta iyo dib-u-magacaabistana uu ku dhawaaqay Golaha loo dhan yahay ee Ummadaha Midoobey fadhigoodii 56naad ee bishii Diisambar sannadkii 2001. Ururrada aan dawliga ahayn natiijada ka dhalatay dib-u-abuurista iyo bedelaada lagu sameeyay, hay'adda UN HABITAT ama Hay'adda Deegaanka ee Ummadaha Midoobay, ayaa waxa ay tahay in ay fursad u hesho inay ka caawiso dawladaha iyo lamaanayaasha sidii ay u fulin lahaayeen ajendaha ama Barnaamijka UN HABITAT. Barnaamijkaasi oo Golaha loo dhan yahay ee Ummadaha Midoobay uu ku baaqay sannadkii 1996, shir weynihii Istanbul, Turkiga baaqaasi oo Golaha loo dhan yahay uu cusboonaysiiyay shirweynihii loo bixiyay Istanbul +5 oo qabsoomay bishii Juun sannadkii 2001. Ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada bulshada ku salaysan, ayaa waxa u taala in ay ciyaaraan kaalin muhim ah sidii loo gaadhi lahaa ujeedada kama dambaysta ah ee uu leeyahay barnaamijka UN HABITAT, taasi oo ah in loo helo dhamaan dadka dunida deegaan nolol fiican leh.

Daabacaadda buug-hawleedyadan ayaa waxa kale oo uu ku soo hagaagay awood-dhisida ee hay'adda deegaanka ee UN-HABITAT. Taasina waxa ay tusaalaynaysaa aqoonsiga aanu aqoonsanahay muhiimadda uu leeyahay dhismaha Awoodda Ururrada, iyada oo noqon karta qalabka loogu hawlgalayo sidii loo gaadhi lahaa ujeedada sare ama yoolka hay'addan ee ah in sannadka 2020 lagu sameeyo hagaajin la taaban karo noloshu 100 millyan oo qof oo ku nool deegaamada isku raranta ah, taasina waa sida lagu cadeeyay baaqa kun-sannadeedka ee hay'adda (Millennium Declaration).

Waxa jira cadaymo isa soo taraya oo muujinaya aqoonsi laysku raacsan yahay oo ku saabsan qiyamka qeexidoona barnaamijka magaalooyinka ee kun-sannadeedka cusub. qiyamkaasi waxa ka mid ah ka-qaybgalin (inclusion). bulshooyinka raba inay hoggaanka hore kaga jiraan isbedelka xagga bulshada iyo xagga dhaqaalaha waa inay aqoonsadaan muhiimadda ay leedahay ka-qeybgelintu, laga qaybgeliyo dadka go'aamada sameeya tayada noloshooda iyada oo aan loo eegin hanti, rag ama dumar, da', isir ama diin.

Qiyamkan labaad ee la aqoonsanayaa waa hoggaanka la wadaago kuwaasi oo ka kala imanaya qaybaha kala duduwan ee bulshada iyo hay'adaha. Tan macnaheedu waxa weeye in loo arko ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada bulshada ku salaysan qaar waxqaban kara iyo lamaanayaal qiimo leh oo ka qaybgeli kara hoggaanka iyo masuuliyadaha buughawleedyada loo biixiyay dhismaha biriishyada (building bridges), oo ay daabacdo hay'adda UN HABITAT, Waxa loogu talagalay inay la tacaalaan maaraynta loo wada jiro ee hawlaha iyo maaraynta colaadaha iyo khilaafyada kuwaasi oo ay u wadajiraan qabashadooda dadweynaha iyo ururrada aan macaash-raadiska ahayn ee bulshada.

Aqoonsiga saddexaad waxa weeye in kor loo qaado kartida urur-ahaaneed ee ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada ku salaysan bulshada, kartidaasi oo ah aqoon, xirfado, waayo aragnimo iyo adkaysi, kuwaasi oo marka laysku geeyo adkeeya awoodooda maaraynta maaliyadeed iyo agabkooda aadamiga ah iyo kartida ay u leeyihiin inay ururro kale la xidhiidhaan lana shaqeeyaan. haddaba si ay u noqdaan lamaanayaal adag oo waxtar leh, ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada

ku salaysan bulshadu waa inay muujiyaan in arrimahooda guduhu ay nidaamsan yihiin.

Buug hawleedyadan, oo ah silsilad qalab lagu fuliyo waxbarasho waxa iska kaashaday soo saaristooda, hay'addaha UN HABITAT iyo ururka loo yaqaan Partners Romania Foundation for Local Development, taasi oo maalgelinta lagu fulinayayna ay ka timid dawladda Netherlands iyo machadka Open Society Institute. intaasi waxa dheer, dad badan oo kale oo ka qayb qaatay soo saarista silsiladan, waxaana ka mid ah:

1. Kooxo ururrada aan dawliga ahayn (URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN s) iyo ururrada bushlo ku salaysan (CBOs) iyo hoggaamiyeyaal dawladdaha hoose oo ka yimid Afrika koonfurta saxaaraha oo go'aan adagna wata ayaa isku yimid si ay u qeexaan baahidooda dhinaca waxbarashada. Waxana ay kulmeen aqoon is-weydaarsi ay qabanqaabisay hay'adda UN-HABITAT oo ku saabsanaa istaraatejiyada dhismaha awoodda, oo lagu qabtay magaalada Nakuru ee dalka Kiiniya bishii Noofember, 1998, kuwaasi oo qayb firfircoon ka qaatay diyaarinta qoraalkii kama dambaysta ahaa. Kulamadanina waxa ay ku gebogaboo-been aqoon is-weydaarsi ka dhacay magaalada Neyeri ee dalka Kenya sannadkii 2001.
2. Waxa iyana ka qaybgalay tijaabada qoraalada iyo qalabka tababarka loo diyaarshay shabakad hay'ado ah iyo tababarayaal ah oo ka wakiil ah barnaamijka gobol-ahaaneed ee dhismaha awoodda iyo is-xukunka iyo hoggaaminta maxaliga ee dalalka Yurubta bari iyo Yurubta dhexe.

Ugu dambaystii waxa aan jecelahay in aan u mahadnaqo Mr. Fred Fisher oo qoraaga buug-hawleedkan oo isla markiina ah qoraaga guud ee taxanaha buugaga ah iyo kooxda khubarada oo aad u heer sareeya ee la qoray buugaagta. Waxa kale oo aan mahadnaq u celinayaa kooxda khubarada ah ee uu ka madaxda yahay Tomasz Sudra, kuwaasi oo iyaguna isu geeyay khibradooda si ay u dhamaystiraan qoraaladii qabyada ahaa iyo wax soo saarkii kale. Waxa kale oo iyaguna xusid mudan kooxda Romania ee ka socda ururka (partners Romania Foundation for Local Development) ee ay madaxda ka tahay Ana Vasilache oo iyaguna ka mas'uul ahaa qaabka loo dhiganayo buug-hawleedyada iyo nidaamka loo dejinayo qoraalkooda kama dambaysta ah.

**Anna Kajumulo Tibaijuka
Under Secretary General and
Executive Director (UN – HABITAT)**


**HOR-DHACA KU SAABSAN DHISMAHA AWOODDA FIDITAANKA
URUREED**

Cutubka 1

*Si cad u hadal, rootiga ku sheeg rooti, biyahana biyo
Maahmaah Miksikaan ah.*

*Ninka doonaya inuu wax weyn qabto, waa in aanu isku deyin keligii,
Maahmaah Dadka Seneka*

*Irbaddu waa ay taqaan waxa ay tolayso, birta fargashiga ahina waxa uu riixayo.
Maahmaah dalka Kolombiya.*



Maahmaahaha kor ku xusani waxa ay iftiiminayaan saddexda xirfadood iyo hababka udub-dhexaadka u ah dhismaha awoodda is-fidinta (outreach) (?) ee ururka: Saddexdaas xirfadood ee is-fidinta ururku waxa weeye: Isgaadhsiinta, kobcinta istaraatejiyado lagu abuurayo is-bahaysiyo iyo soo jiidashada ururrada kale iyo dadka kale. Labada xirfadood ee is-gaadhsiinta iyo soo jiidashada dadka kale waxa hoos yimaadda dhowr qadiyadood oo ay ka mid yihiin istaraatejiyadaha, xirfadaha qalabka iyo hababka kuwaasi oo ururrada aan dalwiga ahayn iyo ururrada bulshada ku salaysan ay u adeegsadaan kobcinta is-fidinta (outreach) ee ururkooda. Xirfadda dhismaha is-bahaysiga straatjiyadeed ee loo adeegsanayo habka is-fidinta ururka, waa uu ka dhib yar yahay abuuristiisa iyo kobcintiisu.

Is-gaadhsiinta iyo soo jiidashadu (influence) waa xirfado iyo istaraatejiyadda saamayn ku leh hawlgallo badan oo kala duduwan oo qof-qof iyo wada jir loo qabto. Isgaadhsiinta iyo soo jiidashadu waxa ay noqon karaan qaar dadka dhexdooda ah, kuwo ururrada ka dhexeeya iyo kuwo ururka dhexdiisa, qaar qoraal ah, qaar hadal ah, qaar rasmi ah iyo qaar aan rasmi ahayn, kuwo gaar ah iyo dadweyne oo guud ahaaneed. Labadani waxa ay noqon karaan kuwo waxtarkooda ama khayraadkoodu uu aad u badan yahay kuwaas oo inta badan xor loo yahay in la isticmaalo, hase yeeshee marar badan ay kharash badan tahay sidii loo heeryayn lahaa ee loo adeegsan lahaa. Xirfaduna waxa weeye in intii watar lagala soo bixi karo farshaxanka iyo khibradda isgaadhsiinta iyo soo jiidashada in lagala soo baxo iyada oo kharashka ugu yar ku kacaysa ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada ku salaysan bulshada.

Ururrada bulshada ku salaysan kuwooda yaryar ee leh agab ama khayraad kooban, waxa laga yaabaa in aanay u suurtoobin hoggaamiyehooda in ay raad ballaadhan ku yeeshaan siyaasadaha iyo shuruucda la samaynayo xataa heer degmo, ama in ay ku dhaqaaqdo olole ballaadhan oo dhinaca isgaadhsiinta ah oo ay ku muujinayso dareenka iyo baahiyaha bulshadooda. Hase yeeshee, ururradu waa ay is bahaysan karaan, isbahaysigana waxa ku jira itaal iyo xoog ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada ku salaysan bulshadu waa ay isku gayn karaan codkooda marka uu heshiis ka jiro qadiyadaha u baaahan isgaadhsiin iyo soo jiidasho ee markaasi ka ballaadhan xuduudaha urur ahaaneed ee urur kasta. Dhismaha awoodda is fidinta (outreach) urur ahaaneed asalkeedaba waxa weeye, hab saameeya cid kale ama hay'ado kale kuwaasi oo kuwa aad ku isticmaalayso is-gaadhsiintaada iyo soo jiidashadaada ama sidii aad go'aan uga gaadhi lahayd abuurista is-bahaysi hay'ado iyo shakhsiyado kaa caawiya sidii aad u gaadhi lahaydeen ujeedo guud idinka oo ah ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada bulshada ku salaysan.

Xubnaha ka qaybgalay aqoon-isweydaarsigii Nakura ka dhacay, waxa ay la yimaadeen hoggaamin qiimo leh oo ku saabsan saddexda walxood ee kor ku xusan, kadib markii ay soo bandhigeen niyad jabkooda iyo rajadooda. Su'aalaha ay is-weydiinayeen intii uu aqoon-isweydaarsigu socday waxa ka mid ahaa:

- Haddii aanu nahay hoggaamiyeyaasha ururrada aan dawliga ahayn sidee ayaanu ula samayn karaa is-gaadhsiin waxtar leh oo qancisa ka faa'iidaystayaasha (beneficiaries), deeq-bixiyeyaasha, dawlada hoose iyo war-baahinta? Marba marka uu ururku ka sii yaryahay ayay hawshuna ka sii adag tahay.
- Sidee ayaanu u sii hagaajin karaa xidhiidhka gacmo-is-qabsiga (networking) taasi oo ah sidii aanu anagu xidhiidh u samaysan lahayn isla markiina wax wadaqabsi ula yeelan lahayn kuwa ka baxsan xuduudahayaga urur ahaaneed ?
- Sidee baanu ugu yeelan karaan raad samaynta shuruucda iyo siyaasaddaha?
- Sidee ayaanu wadashaqayn waxtar leh ula yeelan karaa dawlada hoose wixii khuseeya qadiyadaha iyo dhibaatooyinka labada dhinacba ay daneeyaan ?

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

- Sidee ayaanu u samayn karaa is bahaysiyo iyo lamaanayaal kordhin kara awooddayada isgaadhsiineed si aanu u gudbino dareenkayaga isla markiina u kordhino dareenkayaga isla markiina u kordhino dareeknayaga soo-jiidasho si aanu u xaqiijinno risaaladdayada iyo ujeedooyinkayaga?

Su'aalahaasi waxa ay qayb ka yihiin oo ay tusaalaynayaan tiro badan oo xirfado iyo istaraatejiyado ah oo looga baahan yahay dadka dhexdooda ama ururrada dhexdooda. Su'aalahaasi waxa kale oo ay si sax ah u muujinayaan in shakhsiyadaha ka mid ah ururrada aan dawliga ahayni iyo ururrada ku salaysan bulshadu ama kor u qaadaan xirfadahooda isgaadhsiineed iyo kuwooda soo jiidasho. Waxa kale oo ay tusayaan in ururrada gaar-gaarka ahi in iyaguna ay kordhinayaan awoodooda is-fidinta taasi oo ku imanaysa iyaga oo hagaajiya hawl-galadooda iyo istaraatejiyadahooda isgaadhsiineed iyo kuwa soo-jiidasho. Ugu dambaystiina waxa jira aqoonsiga la aqoonsaday in ururrada aan dawliga ahayni, marka ay kali kali u taagan yihiin, in aanay lahayn agabkii iyo awoodii maaliyadeed ee is-gaadhsiinta iyo soo jiidashada waxtarka leh marka laga hadlayo qadiyado badan iyo arrimo badan oo kale oo udub-dhexaad u ah rasaaladooda iyo ujeedooyinkooda. Sidaa awgeed waa in ay ururradaasi samaystaan is bahaysiyo, haddii ay rabaan in raadka loo baahan yahay ay ku yeeshaan ammuuraha, isla markiina ay isbeddelada lagama maarmaanka ku keenaan bii'adooda shaqada.

Khariidada Dariiqa: Hadaba iyada oo loo jawaab-celinayo baahiyaha awood-dhisida ee ururrada aan dawliga ahayn waxa aynu awoodda saaraynaa cutubka labaad qodobada hoos ku xusan:

- Sida kor loogu qaado ee loo hore-mariyo qorshaha iyo straatijayda is-gaadhsiineed.
- Sida loo hagaajiyo xirfadaada dhegaysi, idinka oo aqoonsanaya in isgaadhsiintu ay dariiq labada dhinac u socda, taasi oo uu dhegaysigu noqon karo qalabka ugu fiican ee aad ku soo jiidan karto deeq-bixiyayaasha.
- Sida ama qaabka waxtarka leh ee loola shaqeeyo warbaahinta isla markiina aad u hagaajinaysid xidhiidhkaaga dadweynaha.
- Sida aad u noqonaysiin xidhiidhiyayaal ka fiican (better network). Waynu isla eegi doonaa waxa ereygan looga jeedo marka la eego shacbiyadda uu ereygani leeyahay marka laga hadlayo istaraatejiyadaha la xidhiidha maaraynta iyo waxtarka qof ahaaneed.

Cutubka saddexaad waxa uu diiradda saarayaa abuurista istaraatejiyadaha lagu dhiso is-bahaysiyada, waxana uu casharkani culayska saari qodobada hoos ku xusan:

- Faa'iidooyinka ay leeyihiin is-bahaysiyada iyo lamaanayaasha.
- Noocyada is bahaysiyada iyo ururrada xulafada noqda; iyo
- Sida loo abuurto loona daryeelo isbahaysiyada istaraatijiga ah.

Casharka afraad, oo ah casharka ugu dambeeya qaybta koowaad, waxa uu culayska saari qodobada hoos ku xusan oo ku saabsan noocyada istaraatejiyadaha soo jiidasho ama raad ku-reebista (influence strategies):

- Xidhiidhka ka dhexeeya awooda iyo soo jiidashada (influence);
- Habka nidaamsan ee loo waajahayo istaraatejiyadaha soo jiidashada;
- Geedka cufan ee ay noqdaan siyaasaduhu iyo sida aad u dhexgalaysid; iyo
- Sida loogu halgamo raadna loogu yeesho samaynta siyaasadaha.

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO
KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**


Labadan buugg ee lamaanaha ah, buuggiisa labaad ama qaybta labaad ee loo bixiyay qalabka (tools), waxa laga helayaa layliyo waxbarasho oo habaysan iyo waayo-aragnimada loo baahan yahay si aad dhamaan dhinacyadaasi khuseeya hore-u-marinta xirfadaha. Inkasta layliyadaasi qaarkood ay yihiin qaar uu qofku iskiis isku bari karo, marka ay tahay barashada qof ahaaneed, haddana dhamaan qalabka (tools) waxa loo sameeyay naqshad tababar kuwaasi si ay u adeegsadaan cidii rabta in ay qaban qaabiso barashada waayo-aragnimada koox ahaaneed. Qalabka ku yaalla buugga labaad in ay la socdaan ama tusaaleeyaan fikradaha ama istaraatejiyadaha ku qoran buugga koowaad.

IS-GAADHSIINTA ISTARAATEJIYADAHA IYO XIRFADAHA

Cutubka 2

Haddii aan rabno in aan si xaq ah u fikirno, waa in aan fahamnaa waxa ay dadka kale ujeedaan; haddii aan rabno in aan ogaanno qiimaha fikradaheennu ay leeyihiin, waa in aan ku eegnaa raadka ay ku leeyihiin maskaxaha kale.

William Hazlett, 1826.



Iyada oo ereyga isgaadhsiin uu noqday hal-hays ballaadhan, ayaa sida ugu fiican ee aad u fahmi kartid wixii uu ururkiinnu qaban karo dhinaca is-gaadhsiinta ayaa waxa ay tahay in uu abuur qorshe isgaadhsiineed. Qorshahani waa inuu ku salaysnaadaa aragtida iyo risaaladda ururkiina, ujeedooyinka aad doonaysaan in aad gaadhaan iyo qiyamka iyo caqiidooyinka muhimka u ah, ururkiina shaqaalenimo, ka faa'iidaystayaasha hawshiina iyo daneeyayaasha (stake holders) intaba. Qaabka aad u qoraysaan aragtidiina, isla markiina aad uqeexaysaan risaaladiina iyo sida aad u dejinaysaan ujeedooyinkiina guud iyo kuwo intaba waxa ay ku qoran yihiin buugga silsiladan ka mid ah ee loo yaqaano "qorshaynta loo wada jiro" (participatory planning). Sidaa awgood, ma doonayno in arrimahaas aan halkan markale dib ugu qorno. Hase yeeshee waxa aan ku daray buugga labaad ee ku mataanaysan buuggan foom kaa caawinaya adiga iyo saaxiibadaa sidii aad u abuur lahaydeen qorshe isgaadhsiineed. (ee qalabka labaad – tool 2: Abuuridda qorshe is-gaadhsiineed).

ABUURIDDA QORSHE IS-GAADHSIINEED

Marka aad ka faraxalataan dhismaha seeska, iyo qodobada lagama maarmaanka u ah waxqabadka iyo is-fidinta ururkiina, kuwaasi oo ay ka mid yihiin risaaladda, ujeedooyinka lagu hawl gelayo, qiyamka iyo waxyaabaha aad nuxur ahaan u aaminsan tihiin hay'ad ahaan, markaasi ka dib waxa aad is-weydiinaysaan, waxa aad doonaysaan in aad fulisaan idinka oo adeegsanaya is-gaadhsiinta iyo dhambaal gudbin idinka oo caalamka intiisa kale u gudbinaya risaaladiina. Su'aashuna waxa weeye: maxay tahay sababta aad caalamka ugu gudbinaysaan dhambaalkiinan ku saabsan risaaladiina? Ujeedooyinkiina is-gaadhsiineed ma ka mid yihiin qodobada hoos ku xusan:

- In aad kor u qaadaan muuqaalkiinna bulshadiina dhexdeeda, magaaladiinna iyo gobolkiina?
- In aad hagaajisaan sumcadda ururkiina idinka oo u sii maraya warbaahintu waxa ay idinka qoraan?
- In aad xidhiidh joogto ah la yeelatiin warbaahinta, si ay warkiina u baahiyaan xaaladaha degdegga ah ee idinku yimaadda urur-ahaan ama yimaadda ka faa'iidaystayaashiina ama dadka aad u adeegtaan.
- Inaad kordhisaan baraarugsanaanta xagga barnaamijyadiina, sida ka-war haynta koox gaar ah oo aad hawl u fulinaysaan.
- Xubno ka mid ah bulshada oo aad doonaysaan in aad fikirkooda ama waxa ay qabaan aad bedeshiin.
- Ka abuurida taageero dadweynaha iyo siyaasad sameeyayaasha iyo kooxaha kale ee muhimka taageeradiisa oo aad doonaysaan in la beddelo siyaasadaha ku saabsan qadiyad idiin muhim ah ama idin khusaysa.
- In aad kordhisaan taageerada maaliyadeed iyo tan dhaqaale.
- In aad abuurtaan wadahadal iyo dood idinka iyo daneeyayaashiina ugu muhimsan.

Waxa jirta in aan marar badan isticmaalay ereyga "daneeyayaasha" (Stakeholders), waxana laga yaabaa in akhristayaashu aanay aad u garan waxa aan uga jeedno "daneeyayaasha". Daneeyayaashu waa qof kasta, ama koox kasta, ama urur kasta oo dan ka leh ururkaaga, waqtigaaga, khayraadkaaga iyo adeegaaga ama ay saamayso ururkaaga jiritaankiisa iyo wixii xataa. Daneeyayaashu waxa ay noqon karaan qaar saaxiib kuu ah ama col kuu ah waxqabadkaaga, risaaladaada iyo ujeedadaada. Marka sidan ballaadhan loo macneeyo ururkiina iyo xidhiidhka ka dhexeeya, waxa kuu cadaanaysa in qorshihii isgaadhsiineed uu noqdo mid isna aad u ballaadhan.

Su'aalahaasi waa su'aalaha ku saabsan sababta (why questions), kuwaasi oo muhim ah oo ay tahay in la tixgeliyo marka la abuurayo qorshe isgaadhsiineed oo ku saabsan isfidinta ururka. Haddii aanad hubin sababta aad ugu baahan tahay in aad gudbiso dhambaalkaaga, markaasi waxa dhacaysa in aanad dhambaalkaaga si fiican ama si hufan aanad u gudbin dhambaalkaaga. Jawaabaha aad ka bixisid sababta aad rabtid in aad u gudbisid dhambaalkaaga, ayaa go'aaminaysa dhambaalka aad u baahan tahay in aad gudbiso iyo nuxurkiisa macluumaadka, fikradaha, qiyamka iyo ujeedooyinka guud (goals).

Marka su'aalahaasi si fiican looga jawaabo, waxa aad u baahan doontaan in aad ka jawaabtiin dhowr su'aalood oo aasaasi ah, sida kuwan hoos ku xusan:

- Ayaynu u baahanahay in aynu dhambaalada u gudbino?
- Sidee ayaynu u gudbinaynaa dhambaaladeena?
- Sideebaynu ku ogaannaa inaynu ku guulaysanayno dhambaal gudbinta?

YAY TAHAY IN AY ISGAADHSIINI IDIN DHEXMARTO, SIDEE AYAYSE IDIIN DHEX MARAYSAA?

Marka aad hoos ugu gonda-degto masalada ah cidda ay tahay inaad la xidhiidh samaysato, wax kaloo kugu soo dhici doonta inaad ka fekertid, sidii aad u gaadhi kari lahayd shurkaaleyaashaada ma huraanka ah. Aan kasoo qaadno in Hay'addaada Saldhig Deegaaneed ay ka hawl-gasho xarun xannaano oo maalintii uun shaqaysa oo ku xigta warshad dharka samaysa oo degaankiinna ku taal. Agaasime ahaan, waxa aad u baahan tahay in aad u heshid hooyooyinka manaafacaadsada ad-eeqga xaruntu fidiso macluumaad ku saabsan isbeddello la soo jeediyey in lagu sameeyo adeegga. Istaraatejiyadiina war baahintu waxay noqon kartaa mid fudud, sida fursad loo siiyo Agaasimaha Xaruntu uu xogta ku helo iyo sida ay xogtaa cusubi ugu gudbi lahayd dadka manaafacaadsada addeegga. Amase, waxaabad yeeli kartaa shakhsiyan inaad dhex joogto marka carruurta la soo ururinayo haddii aad rumaysan tahay inay macmiishaada muhim u tahay inay dhambaalka adiga toos kaaga helaan.

Haddaad doonayso inaad xidhiidh la yeelato Dawladdiinna Hoose, waxa dhici karta arrintu inay sidaa kashii yara adkaato. Wixii aad doonayso inaad u gudbiso dawladda hoose iyo sidaad u samaynaysaaba waxay ku xidhnaan karaan nidaamyada ay u degsadeen inay kula xidhiidhaan cido kale. Metelan, Golaha la doortay waxa laga yaabaa inay leeyihiin nidaamyada aad rasmi ah oo ku saabsan sida ay doonayaan in iyaga loola xidhiidho. Waxa laga yaabaa inay ku xidhi karaan dadka soo doortay inay hawlaha ay ka leeyihiin usoo maraan Karraaniga Golaha, ama haddii ay tahay arrimo Maarayn khuseeya, inay usoo maraan Sarkaalka ka madax ah maamulka. Sida aad ula xidhiidhayso Hay'adaha kale, Saraakiishooda iyo hawl-wadeennadooda waxay ku xidhnaan doontaa waddooyinka iyo nidaamyada ay u dhigteen wada xidhiidhka iyo weliba kuwa aad idinku dhigateen.

Haddiise qasdigiinnu yahay inay farriinni gaadho dhegeysteyaal baahsan metelan dadweynaha guud ahaan, markan istaraatejiyadiinna waxa soo geli kara adeegsiga qalabka war-baahinta haddii hantida ay kaaga baahan doonaan karaankiinnu gaadho, sida waraaqo dadka wada gaadha oo boosta ugu dirtaan amaba hab kale oo istaraatejiyado ballaadhan ku salaysan.

Istaraatejiyaddan war-isgaadhsiineed waxay noqon kartaa mid qaali ku kacda, xagga lacagta

naqadka ah iyo xagga xoogga shaqaaleed. Arrinta ugu dambaysa ee khusaysa sida loo waajahayo marka la isku dubba-ridayo qorshe war-baahineed waa Qiime intee leegbuu ku kacayaa?

Maadaama dadka uu daliilkani gaadhi karaa aad u kala duwan yahay, duruufahooduna aad u kala jaad yihiin, way adagtahay in la isku koobo gaar ahaan wixii qorshahaaga war-baahineed inay ku jiraan ahayd. Haddii aad ka jawaabi kartid su'aalihii hadda laga faallooday, ee ah Waayo, Maxay, Ciddee, goorma iyo Sidee su'aalaha ku saabsan war-baahinta intaad gaadhsiin kartaan awgeed iyo dersidda isugeynta qiimaha uu ku kacayo hir-gelinta qorshahiinnu, waxaad awood u yeelan doontaa inaad ogaato nooca ay tahay istaraatejiyad war-baahineedka u habboon ururkiina. Ugu dambaynta, waxa uu qorshahiinnu u baahan yahay inay ku jirto tallaabo qiimayneed oo koobi doonta sida uu wax-ku-ool u yahay qorshihiiinna war-baahineed marka uu gaadho dadkii loogu tala-galay. War-baahinta Waajibaadka, adeegyada iyo baahiyaha hay'addaada waxay noqon karaan qaali lacag ahaan, muddo ahaan iyo xoogga shaqaaleed ee idinku kacdaa. U dhaqan hannaan istaraateji ah, una yeel tilmaan astaysa raad-reebka Istaraatejiyadiinna war-baahinta.

*Adduunyo wanaagsani uma muuqato dadka iyagu aan ku iimaan qabin iyada.
LADISLAV BRIESTENSKY*

DHEGEYSIGU WAA WEJI KALE OO ISTARAATEJIYAD WAR-IS-GAADHSIINEED AH

Miyuu dhegeysigu qorshihiiinnaa war-is-gaadhsiinta ugu jiraa inuu shacbiyadiinna iyo dano-wadaagyada kaleba u yahay qayb muhiim ah? Dhamaanteen yaalaa waynu hilmaamnaa qaybta madhaafaanka u ah geeddi-socodka war-is-gaadhsiinta marka aynu isku dubba-ridayno qorshaha war-is-gaadhsiineed ee ururkeenna. Marka ay joogto suurto galnimada arrinta aan caad saarrayn waxaynu doonaynaa inaynu ku doodno dhegeysiga firfircooni inuu qayb muhiim ah ka noqdo istaraatejiyadda war-is-gaadhsiineed ee hay'ad kasta oo shaqadeedu ku jihaysan tahay adeeg iyo soo jiidasho dad inay kasbato.

Sida aynu hadhow u tilmaami doonno, dhegeysiga waxa loo gartay inuu ka mid yahay xirfadaha war-isgaadhsiineed ee maareeye inu yeesho looga baahan yahay kuwa ugu muhiimsan, haddaanu noqon ka ugu muhiimsanba. Waxaan rumaysanahay inuu yahay seeska gundhigga ah ee ay ka dul dhisan yihiin dhamaan qayabaha kale ee is-gaadhsiintu. Daqiiqado ayaynu ku guda-geli doonaa, farsamooyinka qaarkood, balse horta aan isla eegno maahmaaho ku saabsan dhegeysiga oo meelo kala duwan oo dunida ah laga soo qaatay.

- **Dalka Biiruu(Peru)**
Haddii aan wax dhegeysto anaa faa'iidada hela, haddii aan hadlana kuwa I dhegeysanayaa ayaa qaata.
- **Dalka Jabbaan(Japan)**
Qofka aammusan ayaa badanaaba mudan in wax laga dhegeysto.
- **Qabiilka Maraykanka ah Yurok ee**
Aammusnaantu micneyaal badanbay leedahay

- **Qabiil Jabo ee Afrikanka ah**
Qofka wax dhegeysta ayaa isagu ah kan wax fahma

- **Dalka Litweeniya(Lithuania)**

Wax dhegeyso inta badan oo wax yar hadal.

Inaynu aammusnaanaa damaanad qaad uma aha inaynu dhegeysanno keliya ama u dhegeysanayno ujeedo micne leh iyo inaynu fahamno. Haddana se, aammusnaan in cabbaar ah aad isku kalliftaybaa ah wax aanay ka maarmi karin farsamada dhegeysiga firfircooni. Cabbiraadaha, istaageerka, dareen iyo ra'yi wadaagga iyo kuwa fahmidduba waa waxyaalo kale oo aan laga maarmi karin. Xoojinta awoodda is dhegeysigu uu wax-ku-ool u noqdaa waxay toos ugu jawaab-celinaysaa ka qayb-gelayaashii Aqoon-isweydaarsigii Nakuru arrimihii tababarka war-isgaadhsiinta ugu mudnaa: **Sida xidhiidh aad u wax-ku-ool ah loola yeesho dadka manaafacaadsada adeegyadiinna.** In aad dhegeysato dadka aad u adeegto iyo egmadeyaashaada, ayaa kaa dhigaya inaad lahaato diyaar-garaw wacan oo aad kula xidhiidho dano-wadaagyada kale sida xukuumadda, deeq-bixiyeyaasha iyo war-baahinta.

WAA MAXAY WAXA U GAARKA AH DHEGEYSIGA FIRFIRCOON?

Wax walba ka hor, dhegeysigu waa ka mid xirfadaha maaraynta ugu muhimsan ee aynu yeelan karno. Dhawr sano oo ina dhaafay ka hor, koox cilmi-baadheyaal ah oo ka tirsanaa Jaamicadda Loyola ee Shikaago (Chicago) ayaa diraaad sameeyey si ay u ogaadaan awoodda qudha ee ugu muhimsan ee laga doonayo in lahaado Maareeyaha firfircooni. Markii ay baadhitaankooda ka qayb-galiyeen boqollaal hay'adood, waxay kusoo geba-gebeeyeen in dhegeysigu yahay xirfadda ugu muhiimsan ee Maareeye.

Haddii dhegeysigu aad u muhim yahay, Maxaynu sida wanaagsan ugu dhaqmi weyney? Ugu horrayn, dhegeysigu waa hawl adag. Waxay qaadataa tamar iyo ihtimaam xooggan in si firfircoon wax loo dhegeysto. Mar labaadka, waxa ina asqeeya dhambaallo joogto inoogu soo qulqula, waxaanaynu baranaa sida loo kala shaandheeyo xaddi badan oo ah dhambaallada xaggeenna loo soo jiheeyey. Nasiib darrose, waxaynu ka qaadannaa dhambaallo aan ahayn kuwii aynu qaadan lahayn. Mar saddexaadka, waxaynu yaalaa go'aansannaa waxa qofka kale markaa aan afkiisa kasoo wada dhamaan inaga oo aynu ku boodnaa jawaab gole-ka-fuulka. Tani, runtii, waxay isla markiiba goysaa dhegeysigii socdey had iyo jeerna inaga dhabqisaa dhambaalkii aynu sugayney ee aynu maqli lahayn. Ugu dambayntii, intenna badani weligood ma helaan wax tababar ah oo ku tacalluqa si firfircoon in wax loo dhegeysto.

Adigu weligaa ma weydiisey naftaada, "Bal, maxay uga jeedaan dhegeysi firfircoon iyo ka taban?" Waa hagaag, waxaan kaloo haysannaa iyo iyada oo aanay qoraallada ku saabsan dhegeysigu ka bixin fasir qeexan waxa loola jeedo micnaha erega "Firfircooni". Si ay inooga caawiso inaynu fahamno ereyga "firfircooni" marku la socdo "dhegeysi firfircoon, waxaynu jeedaalo ugu noqonayaa buugga dhowaan soo baxay ee ku saabsan doorka maareeyuhu leeyahay fududeeye ahaan. Curiyeyaasha Kitaabku waxay ku fasireen ereyga "Dhegeysiga firfircoon" in micnihiisu yahay "dariiqada aynu dedaal xusbadeed ugu jeesanno si aynu u fahamno qof kale". Dedaalka waaciga ah si loo maaraynta hab socodka dhegeysigu wuxuu isugu jiraa saddex farsamo ama xirfadood oo isku xidhxidhan:

1. **Ogaanshaha:** Waa dareemeyaasheenna oo dhan u wada adeegsanno kasbidda xogta la inna siinayo.
2. **Micnaysiga:** Waa dhuuxidda iyo fahamka macnaha xogta lagu hadlayo.
3. **Hubsiiimada:** Waa xusbad u yeelashada wixii la maqlay iyada oo lagu dedaalayo in laga dheefo is-faham qofba ka kale wuxu ku hadlayo ka qaato.

Sidaasi ayaanu dhegeysiga firfircooni ahayn keliya dhegeysi uun. Wuxu inooga baahan yahay inaynu isku shuqlino sheeko la isu celceliyo innagoo kaga shaqaysiinayna dareennadeena ogaal oo dhan isla mar ahaana wax dhegeysanayna, taasoo dusha marka laga eego la yara moodo inay labadu yihiin wax iska hor jeeda. Laakiin, sida hadalku u dhacayaa waa nooc aad uga duwan ta inoo caadada ah marka aynu sheekaysanayno.

Waxa aynu nidhaahno inta uu socdo dhegeysiga firfircooni wuxu ku jihaysan yahay in si fiican aan u fahamno waxa qofka kale ku hadlaayo, asaynaan ku dukhuulin afkaarta, caaddifadaha iyo dareennada aynu innagu qabno iwm. Waa wax aad u adag in sidaa la yeelo, sida aynu wada garanayno, laakiin faa'iidadeeda ayaa aad uga miisaan weyn qiimaha ku baxa. Bal aan yara jeed-aalinno saddexda xirfad-hoosaad ee aynu soo sheegnay, isla kuwii qoraal-curiyeyaashu ku hoos nabeen dalladda xirfad-weynta dhegeysiga.

Ogaanshaha- waa kasbidda fahamka buuxa ee bii'adda war-is-gaadhsiinta ee aan lagu koobnaan keliya mawjadaha dhawaaqa u kala socda afka qofka hadlaaya iyo dhegahiinna. Waxa kale oo aynu u baahannahay inaynu dhegeysanno dhaqdhaqaaqooda, calaamadaha wejiga, siiqadda cod, xawliga iyo mugga dhambaalka- dhamaan tibaaxaha muuqaal iyo kuwa cod ee weheliya ereyada mutuxan. Hab dhiska muuqaalka dusha ayaa isna lamaane firfircoon ka noqon kara geeddi-socodka war-is-gaadhsiinta. Maareeyeyaasha qaarbaa isticmaala miisas waayeyn oo meel yara sarraaysa oo welibana woxoogaa yara durugsan ay dhigtaan, si ay u gudbiyaan qayb weyn oo dhambaalkooda ka mid ah. Ogaanshuhu waa qaadashada wax kasta oo dibadda usoo baxa ee loo adeegsaday si loo gudbiyo dhambaalkaa.

Macnaysiga: Waa awoodda fahamka xogta la bixinayo iyo qiimaynta iyo falanqayntooda. Waa tijaabo weyn oo lagu bilkeydi karo inaad tahay dhegeyste firfircoon iyo in kale, inkastoo marka dusha laga eego ay u muuqato wax aad u sahlan. Waxay inooga baahan tahay inaynaan daba socon keliya waxa qofka kale odhanaayo si aan u fahanno micnaha ereyada, laakiin waxay inaga doonaysaa inaynu daba-martayno carqalad kasta oo aynu innaga xidhaysa sidii aan u fahmayno waxa qofka kale ku hadlaayo. Ma ogaatey sida ay ereyo qaarkood hawada kuugu diri karaan? Dhinaca kalena, sida ereyo kaaga soo duula miiska dhinaciisa kale ay kaaga dhigi karaan inaad wanaag dareento. Waxa kaloo aynu qaadanaa sida waxyaabaha ili-ma-qabatayga ah ay dhegtu uga shaandhayso kuwa aynaan doonayn in aynu maqallo. Mararka qaar shaandhooyinkaasi way maydhaamaan waxa qofka kale ku hadlaayo halkii ay innaga joojin lahaayeen. Axadhiddu waa midda ugu wada adag xirfad hoosaadyada ee laga doonayo inuu lahaado dhegeystaha firfircooni. Waxay innaga doonaysaa inaynaan noqon dar wuxuun isku qufula.

Hubsiiimada- waxa yaalaa lagu tiriyaa inay tahay xirfadda ugu fudud uguna muhiimsan ee dhegeysiga firfircoon, maxaa yeelay, waxay inna siisaa fursad aynu ku hadalno. Laakiin ma aha nooca hadal ee joojiya odhaahda qofka kale mana aha mid mar qudha aad kusoo wada gudbin karto wax kasta oo aad maskaxda ku haysey sidii aad u wada odhan lahayd marka ugu horraysa ee aad hesho fursad aad sheekada ku gasho. Weligaa ma ku qabatay naftaada adigoo waqtigaaga oo dhan ku luminaya sidii aad uga fekeri lahayd qorshaynta wixii aad odhan lahayd iyada oo qofkii

kale hadlaayo taasina ay ku dhaafisay boqolkiiba sagaashan dhan dhambaalkii? Hubaashii waad yeeshay? Sidoo kale annaguna waan yeelnay. Taasina ma aha dhegeysi firfircoon.

Hubsiiimadu waxay kaloo tahay farshaxan quruxeedka weydiinta su'aalo looga gol-leeyahay bayaaminta iyo jeedaalo hadal ahaan waxa qofka kale leeyahay. Su'aal bayaamineeddu waxay noqon kartaa wax u eg - "Maxaad ula jeeddaa sida ugu dhakhsaha badan?" iyo "Ma cayimi kartaa maalinta iyo waqtiga ay kaga beegan tahay maalinta aad maskaxda ku haysid?"

Odhaahaha jeedaaladu waxay mararka qaarkood noqdaan wax bilaa micne ah oo muujinaya keliya inaad si buuxda isugu shuqlinayso inaad dhegeyste firfircoon noqoto. Waxay noqon karaa wax u fudud sida "Hmmm", madaxa oo aad ruxdo ama wixii la yidhi oo ereyo kale ku sheegto, sida "Wixii aan maqlay ee aad lahayd waxay ahaayeen.....". Waxay kale oo ay noqon kartaa su'aalo la isu weydiyo si qofka kale looga soo saaro xog dheeraad ah ama xog ka duwan. Maxay ahaayeen waxyaabaha kale ee aad maanka ku haysey?

Dhisidda awoodda ballaadhinta ururku waxay ka bilaabantaa inaad yeelato xirfadihii aad ku noqon lahayd dhegeyste firfircoon.

Taasi laga yaabaa inaanay ahayn wax aad maskaxda ku heysey xagga dhisidda awoodda fiditaanka iyadoo la adeegsanayo istaraatejiyadaha war is-gaadhsiineed. Si kastoo ay tahay, waxa aad u baahanaysaa in aad dhambaalkaaga dibadda u saarto. Waxaad u baahan tahay inaad si aad ah ugu jajabnaato xidhiidhka war-is-gaadhsiinta ee aad la leedahay macmiishaada, hay'adaha xukuumadda, deeq-bixiyeyaasha ku kaalmayn kara iyo qalab war-baahinta ee kugu kaalmayn kara inay weedhaadu fiddo.

Hay'ad adeeg ama tu taageere mid aad tahayba, in xoog raandhiis leh aad yeelataa waxay ku xidhan tahay inaad jawaab ka bixiso uguna feejigan tahay baahiyaha, danaha iyo dhibaataada dadka aad u adeegto iyo weliba si buuxda inaad u fahamtid waxyaabaha ahmiyadda u leh iyaga, ka hor inta aanad u jeedin ajandaha adigu aad wadatid, wax kastaba ha ahaadee. Taasi waxay u baahan tahay dhito xogeed xoogleh oo sax ah in aad haysato. Iyadoo laga yaabo inaad waxyaabahan qaar ku hesho baadhitaan rugta kutubta, ilaha xogaha dahan, macluumaadka iyo afkaarta ugu waanaagsani kaaga soo bixi karaan hadba inta ay leeg tahay awoodda dhegeysi firfircoon ee xusbadda ogaalka, micnaynta iyo hubsiiimada aad u leedahay waxay ku hadlayaan dadka egmadeyaashiina, macmiishaada, taageeryaashaada iyo cidda aad shurki doontaan mustaqbalka.

Richard Axelrod, shuruudaha hawlgalkeeda, sidan buu ka yidhi wax khuseeya dhegeysiga oo ah saldhigga dhismaha xidhiidho shebekadeed

Dhegeyso, dhegeyso oo dhegeyso ilaa inta aad dareento in aanad intaa dabadeed qaadi Karin oo haddana dhegesyo weliba qaar kale. Dhegeysigu wuxuu kobciyaa xidhiidho shebekadeedka. U dhegeyso wax faham iyo Shaqee si aad wax u fahamto een ahayn si iska raac uun ah. Bal malee sida ay u ekaan lahayd haddii dunida lagu daawan lahaa indhaha ay iyagu ku eegayaan oo ku dhisan waaya aragnimadooda.

Ka hor inta aynaan u gudbin istaraatejiyadaha war-is-gaadhsiinta casri ah, ku qaado daqiiqado kooban inaad hoos u dhugato tayada kartida waqtigan ururkiinnu dhegeysi firfircoon u leeyahay mudanka dan-wadaagyiinna adiga oo uga gol leh bilkeydka inaad si fiican u fahamto waxa ay

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO
KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

kaa rabaan ama danta ka leeyihiin xidhiidhkan. Adiga oo adeegsanaya qiyaasta ah 1 ilaa 10, iyada oo 1 ka dhigan tahay maba dhegeysanno haba yaraatee, 10 kana micnihiisu yahay gebi ahaanba waanu fahamnaa ujeeddooyinkooda iyo

baahiyahoodaba, u kala derejee xidhiidho shebekadeedka aan soo sheegi doono dabadeedna tax dariiqooyinka aad is leedahay waad ku hagaajin karaysaa awoodda aad iyaga dhegeysi wax ku ool ah ugu yeelanayso.

Mudanka Deeq-helayaasha 1 2 3 4 5 6 7 8 9 10

Waxa aan ku talo jiraa si aan usii hagaajiyo dhegeysiga aan u leeyahay iyaga, in aan

Dawladda hoose 1 2 3 4 5 6 7 8 9 10

Waxa aan ku talo jiraa si aan usii hagaajiyo dhegeysiga aan u leeyahay iyaga, inaan

Mudanka Deeq-bixiyeyaashayada 1 2 3 4 5 6 7 8 9 10

Waxa aan ku talo jiraa, si aan usii hagaajiyo dhegeysiga aan u leeyahay iyaga, in aan

Wakiillada War-baahinta 1 2 3 4 5 6 7 8 9 10

Waxa aan ku talo jiraa, si aan usii hagaajiyo dhegeysiga aan u leeyahay iyaga, in aan

*Waxa aan ka werwersanahay ma aha sida ay
waxyaaluhu yihiin, laakiinse waa sida ay
dadku u haystaan inay arrimuhu yihiin*
EPICTETUS

U LEEIXINTA XIDHIIDHO SHEBEKADEED DADWEYNE DHANKA FIDITAANKA URURKA

Xataa haddii aad tihiin urur yar, waxa jira siyaabo aad u dhisi kartaan awooddiina hir-gaadh marka aad u diyaar tihiin in aad la wadaagtaan macluumaadka hal-doorka Saraakiisha iyo ururrada marka ay fursaduhu isasoo muujiyaan. Metelan waxaad ka qayb-gelaysaa shir uu qabto urur deeq-bixiye ah oo doonaya inuu idinka iyo kuwa kaleba u sheegaan waxa ay qabanayaan. Waxa fursaddan ka dhigan kartaa inaad isbarasho laftaadu siisid wakiilkooda (ladooda) macluumaad qoran oo ururkiinna ku saabsan.

Waxa dhacda, Sarkaal Dawladda Hoose ahoo jaar kiinna ahi inuu kormeerayo mashruuc qof kale leeyahay oo laga yaabo inaad si kediso ah ku kulantaan makhaayadda xaafadda. Waa inaad diyaar u ahaataa inaad u sheegto waxyaabaha uu ururkiinnu kaga hawlan yahay agagaarka iyo inaad u dhiibto macluumaad qoran oo ku saabsan mashaariicdiinna si ay ula socoto wax-qabadkiina, haddii aanad hore ugu diyaar ahayn oo aad isla goobtaa ku siiso.

Weriye ka socda Jariidad maxalli ah ayaa idiinsoo galay si uu u helo tilmaanta URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN kale dabeedna waxaad daqiiqadda ka dhigan kartaa fursad aad u faa'iidayso horumarinta ururkiinna. Dhabtii, ka faa'iidayso waqtiga mid kasta oo xaaladahaasi ka mid ah micnaheedu waa waxa aad u baahan doontaa inaad sidatid waxyaabo kale ka sokow:

- Warqad cinwaan leh astaanta ururkiinna oo naqshad farshaxan ku xardhan
- Warqad kooban oo ku saabsan gogolxaadhka Ururkiinna
- Qoraal bog ah oo sahal loo akhriyo, bog ka tarjuma xaqiiqada ururkiinna
- Himilada, hal-beegga waajibada iyo mudanka yoolka wax-qabadkiina
- Bayaaminta Barnaamijka ama shaqadii u mudnayd eed ku guulaysateen
- Nuqullo maqaallo wargeysyo kusoo baxay oo Ururkiinna ku saabsan
- Nuqulkii u dambeeyey ee warsidhiinna hadduu mid aad soo saartaa jiro
- Sawirro ku saabsan ururkiinna oo hawl ku jira

Qodobbadan kaabeyaasha xidhiidhka dadweyne ah looma baahna inay qaali kugu kacaan waana inay muujiyaan sawirkiinna dhab ah, asaanay muujin sawirka la buunbuuniyey ee sida aad naawilayso inaad ahaatid. Farsamada xidhiidho shebekadeed dadweyne waxay ku xidhan tahay boqolkiiba 90 tabaabalshaha, boqolkii 10na waa xiisaha uu leeyahay marka waqtiga munaasibka lagu beego.

War-Baahinta Iyo Fiditaanka Urur

Wax sheegga War-baahintu ma aha wax iska dhaca uun. Ilamaa, dabcan, bakhaarradiinnu gubtaan, ay dhacdo in agaasimihiiinna la qafaasho, amaba ilaa ay timaaddo dhacdo kale oo mudani in la sheego oo ka dhigi karta ururkiinna mid muddo ay ku xusuustaan warbaahintu marka ishoodu qabato. Haddii aad goosatay in war laga sheegaa muhiim yahay waaridda, korriimada iyo waxtarku

bulshada u leeyahay ururkiinna, haddaba waxa halkan kuu yaal waxyaabo aad samayn karto si aad tan uga dhigto wax suurto-gala:

- Yeel in aad awood garasho saarto sidaad xidhiidh shakhsi ula samaysan lahayd weriye, tafatire ama mid kale oo warbaahinta fure u ah.
- Haddii ay jiraan dhacdooyin ama hawlo ka socda beesha dhexdeeda oo uu ururkiinnu uu mas'uul ka yahay sababta keentay inay dhacaan, weedha gaadhsii marinno kala duwan oo warbaahineed waqtiga habboon si ay ugu meeleeayaan/darsadaan barnaamijyada ay baahiyaan. Iyagaa aragtidooda ku qiimayn doona inuu yahay wax u qalma in la baahiyo iyo in kale.
- Ka qor maqaal gaaban ururkiinna iyo waxa aad qabanaysaan ee khaaska ah. Liishaanka fiiradaada waxyaabaha aad u malaynayso inay xiise u yeelan doonaan akhristeyaashooda.
- U feejignaw la socodka waxyaabaha ay saxaafadda wararka guduhu ay ka faafiyaan heer beeled iyo heer waddan. Miyey maxaddadaha tilifishanka iyo idaacaddu ama wargeyska guduhu baahiyaan mawduucyo ama arrimo ururkiinnu ku hawlan yahay? Hadday sidaasu jirto, hawlaha aad waddaan waxaaba laga yaabaa inay baahin mudan yihiin. La xidhiidh si aad ula socodsiiisaan dedaalkiinna una soo jeedi inaad u qabanqaabiso booqasho inay ku tagaan goobta hawsha ka waddaan.
- Xoogga ku biirsada ururro iyo shakhsiyado kale oo danaynaya inay dhambaal kiinna la mid ah uga baahiyaan qalabka warbaahinta guud. Marka aad xoogga isku biirsataan waxa aad u taagnaan kartaan arrin war-baahinta ka hela qadderin.

Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan yaryar waxa muhiim u ah inay isu-miisaamaan qiimaha ay ku kacayso inay sumcad isla markiiba ah helaan iyo faa'iidooyinka uga soo kordhi doona xayaysiiskaa. Marka la eego tartanka helitaanka fursad war laga baahiyo iyo waqtiga iyo adduunka kale ee ay kaaga baahan tahay inaad gaadho heer aad soo jiidan karto dhigmada war-baahinta, laba jeer ka fiirso oo bilaw inaad uga leexato dariiqooyinka kale ee ka jaban waxtarkooduna ula mid yahay is-gaadhsiinta ka baxsan xudduudaha ururkiinna.

Waxa jira mid cad inay ka reebban tahay. Kuwa iyagu ka hawl-gala magaalooyinka yaryar ama jiidaha miyiga ee ay jiraan wargeysyo maalinleh ama toddobaadleh uga soo baxa, aad bay ugu sahlanaataa inay warbaahinta wax uga faafiyaan. Curiyuhu wuxu ku nool yahay magaalo yar oo leh wargeys maalinleh usoo baxa oo u siisa fursad ay hawlaha URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN ga/CBOga maxalliga ah wax kaga qoraan.

*Marka aad la macaamilayso warfaahinta naftaada u samee.
Ku dhegganaw saddex jawaabood midkood:
Waan garanayaa oo waan kuu sheegi karaa;
Waan garanayaase, kuuma sheegi karo; iyo ma garanayo*

DAN RATHER, War-tebiye

Ka hor inta aynaan u gudbin istaraatejiiyad Hir-gaadh kale oo cusub, waxa muhiim leh inay qadder yar jeedaalo ugu hakanno tusaalaha Dan Rather. Waxa uu si cad u xambaarsan yahay is-qiimaynta war-baahintu isku samayso ee ah inay iyagu xukumaan Ajandaha Wararka. Waa dhambaal ay muhiim tahay in maskaxda lagu hayo, mar haddaad u aqoonsan tihiin warbaahintu inay tahay qayb ka mid ah istaraatejiiyadda is-ballaadhinta ururkiinna.

- *Sidee baad u qiimayn lahayd heerka warfaafintu uga war-baahiso ururkiina? 1 oo u taagan Si kharriban, 10 wuxu yahay si ka fiican ma noqon karto! Amase. Meel labada u dhexaysa, oo ah 2 ilaa 9.*

[] *Ku meelee derejada aad siiso labada qaanso dhexdooda []*

- *Sidee baad ku qiimayn lahayd baahida ururkiinnu u qabo inuu lahaado si ta hadda kasii fiican oo warfaafintu uga war-baahiso?*

1 oo u taagan dhib ma aha; ilaa 10 oo ka dhigan ma jiri karno iyada la'aanteed; []

Adigoo ka dareeraya falanqayntan cilmiyeed ee xaaladdiinna war-baahineed, maxaad, haddii wuxuun tahay, yeeli lahayd si aad u hagajiso? Metelan, haddii ay dhacdo in jawaabaha labada su'aaloodba noqdaan 4 iyo wax ka hooseeya, markaa waxan tuhunsannahay in aad siin kartaan qaybtan istaraatejiyadiinna warfaafineed ka mid ah mudnaan hoosaysa. Dhinac kale marka laga eego, su'aashii u horreysey dhibco hooseeya tii labaadna dhico sarreeya, markan waxay u badan tahay inaad u baahanayso inaad hawl wadeennada shir isugu yeedho si ay uga doodaan arrinta.

Laakiin ka hor inta aanad wax hawl ah qabanin, qor midhadh ah fikrado ku saabsan Sida aad dareemayso ee ku tacalluqa xidhiidho shebekadeed la leedihiin war-baahinta iyo waxa kugu soo dhaca ee aad is tidhaahdo ku dhaqaaq, haddii ay jiraan wuxuun.

*Kuusha adduunka oo dhammi ma noqon karto silis
qoorta lagu xidho ilaa aad xadhig isugu taxto
MAAHMAAH KUURIYAAN*

SHEBEKAD-XIDHIIDHINTA ISTARAATEJIYAD FIDITAAN AHAANEED

Shebeked-xidhiidhiyayaashu waxay weligeed ka ahaan jirtey qayb faa'iido weyn leh awoodda beeshu kaga jawaabto baahiyaha adeeg beni'aadnimada u qabto ee ka baxsan xuduudaha rasmiga ah ee ururrada in kasta oo laga yaabo inaan sidaa loo ogaannin. Isku-xidhiidhsanaanta iyo kasbashada dadku, waxa kale oo ay noqon karaan farsamooyin qiimo u leh ballaadhin ay waajibaadka iyo yoolalka kaga midho dhaliyaan hay'ado badan oo 'URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN'yo iyo 'CBO'yoba leh. Innaga oo u malaynayna in qaar badan oo idinka mid ahi hore usoo ahaayeen isku xidhiidhiyeyaal shebekadeed heer caalami ah, waxaynu yeeli doonnaa, haddana haba yaraatee, inaynu arrintan qaddar faahfaahin ah fasir ka bixinno, maa daama ay u taagan tahay metel hantiyaha dhifka ah ee marka kuwa kale loo eego bilaash kuugu qabsooma, faa'iidada weyna ugu fadhida macmiishaada *(Ka firi faahfaahin dheeraad ah oo ku tacalluqda Kasbashada dadka Toolka 4aad iyo 5aad ee Qaybta Labaad).*

Dhawr sano oo tegey ayaa curiyuhu ku jiheeyey mashruuc cilmi baadhiseed si loo ogaado ma-naafacaadka Isku-xidhiidhsanaanta iyo kasbashada dadka ay u leeyihiin geeddi-socodka bulsho ee isku xidh wax-ku-ool ah oo baahiyaha iyo khayraadka shakhsiga iyo kuwa bulshada ee sife aan rasmi ahayn iyo hab hambaber ah u jira. Curinta cilmi baadhistu waxay ku salaysnayd fikrad

ah inay jiraan isku-xidhiidhsanaan iyo isku xidhiidhiyeyaal shebekadeed u hawlgala si aan rasmi ahayn oo aan cilmiyeysnayn si ay shakhsiyaadka u baahan adeegyo beni aadminimo ugu xidhaan khayraadka ay wakiilka ka yihiin ilaha kala duduwan ee laga yaabo in aanay daruuri ahayn inay hay'adahooda uun ku koobnaan.

Si loo bilkaydo ansaxnimada tan iyo afkaaro kaleba oo ku saabsan kasbashada dadka aan rasmiga ahayn een cilmiyeysnayn, kooxdii mashruucu waxay waraysteen Agaasimeyaasha in ka badan konton urur oo adeeg beni aadminimo ka shaqeeya, oo badankoodu ahaa Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan , si loo ogaado shakhsiyaad buuxinaya shuruudaha soo socda:

- Inay si wax ku ool ah uga kaalmeeyey macmiishooda sidii ay qaniimadaha uga soo abaabuleen dhawr hay'adood oo kala duduwan.
- Inay niyadoodda ka keenay inay iskood uga jawaab bixiyaan codsi kaalmo oo kaga yimid shakhsiyaad hay'ado kale ka tirsanaa.
- Firfircooni ugu dhabba galay macluumaad inuu ka soo urursado saaxad ballaadhan iyo dad badan oo adeeg beni aadminimo daneeya.
- Joogto uga soo shaqeeyey xuduudaha ururkooda dibaddiisa iyo xuduudaha nidaamyada dhisan iyo kuwa rasmiga ah si u qabtaan shaqooyin ixtiraam leh una fidiyaan adeegyo khaas ah.
- Haliso waaweyn ugu badheedhay inay u babacdhigaan si u caawiyaan dad kale
- Tamar badnaan aad u sarraysa, hanuunsanaan hawl qabad iyo digtoonni waacinimoda dhibaatooyinka adeegyada beni aadminimo iyo fursadaha xalal loogu heli karoba.

Jawaabtii waxay ahayd mid aad u badan. Dad ka badan 150 fardi ayaa laga soo doortay saaxad ballaadhan oo hay'ado adeeg beni aadan ka shaqeeya. Kuwii bilawgii la soo doortay, tiro ka badna 20 ayaa laga xushay oo aad loo waraystay si loo helo sidii ay ugu hawl-geli jireen “xidhiidhiyeyaal shebekadeed”. Fikradihii ama soo jeedinii ku saabsanaa xidhiidhiyeyaal shebekadeed iyo xidhiidhinaha habka hawl-galladooda, qiyamta iyo sifaadka shakhsiyeed ee kasoo baxay diraasaddii waxay noqdeen kuwo imtixaanka waqtiga ka baxay. Si laguugu caawiyo inaad fahamto geeddi-socodka xidhiidhinta iyo sifaha shakhsiyeed ee looga baahan yahay kuwo iyagu ah xidhiidhiyeyaal shebekadeed wax-ku-ool ah, waxa aanu idiin soo bandhigaynaa tiro soo jeedino oo laga soo min-guuriyey diraasaddaa.

QODOBBO SHEBEKAD-XIDHIIDHINTA LOO TIX-GELIYO

- Shebeked-xidhiidhintu waa geeddi-socod shakhsi ilaa shakhsi ah een ahayn xidhiidh shakhsi iyo urur dhex-mara.
- Shebeked-xidhiidhintu waxay ku tacalluqdaa qaybsiga awoodda iyo khayraadka
- Qaybsiga awoodda iyo khayraadku lama micne aha inaad iska bixiso
- Shebekad-xidhiidhiye wax-ku-oolka ahi wuxu rumaysan yahay in wax kasta oo beesha ka dhex jiraa yahay ama ahaan karo mid lagu xidhi karo wax kasta oo kale.
- In dhinac beesha ka mid ah wax laga qabtaa waxay la mid tahay in xayndaab weligii sii ballaadha wax laga qabanayo.
- Waa cidda ay Shebekad-xidhiidhisada hawl-karka ahi taqaanno ta aad uga badan waxay taqaanno, ta ay ku xidhantahay kartideeda ay wax-ku-ool kaga hawl-geli karto xidhiidhinta baahiyaha iyo hantida beesha.
- Shebeked-xidhiidhiyaha wax-ku-oolka ahi marnaba kama werwero in loo diido oo laga

- yaabo keliya sababo awgood kuwa kale oo aan doonayn inay ka qayb-galaan.
- Shebeked-xidhiidhiyaha wax-ku-oolka ahi had iyo jeer wuxu daydayaa farsamo kale inuu uga wareego marka tallaabada hore ee isku xidhka baahiyaha iyo khayraadkii la filayey fashilmaan.
 - Shebeked-xidhiidhiyaha wax-ku-oolka ahi wuxu u arkaa xaalad kasta fursad uu wax ku baran karo.
 - Shebeked -xidhiidhiyaasha wax-ku-oolka ahi uma hawl-galaan sida caadiga ah, ee cilaqaadka wax-is-weydaarsi toos ah marka ay yihiin buundada u dhaxaysa kuwa iyagu leh ama fursad u leh helitaanka khayraad iyo kuwa u baahan.

Iyadoo ay talooyinkani ay inoo iftiiminayaan geeddi-socodka xidhiidhinta iyo habka ay xidhiidhiyeyaashu u hawl-galaan, waxa kale oo faa'iido yeelan karta in la baadho sharaxyo kale oo khuseeya istaraajeyidda war-is-gaadhsiinta iyo awood-siinta.

*Xidhiidhiyeyaashu waa socdaal dhex
safraaya duni aan khariidado lahayn.*

JESICA LIPNACK

SIDA DADKA KALE U FASIRAAN SHEBEKAD-XIDHIIDHINTA

Saymour Sarason, caalim ku ah Cilmi-nafsiga, oo wax ka qoray adeega beni aadanka iyo kaalinta isku-xidhidda khayraadka waqti dheer ka hor intii aan kasbashada dadku caan-bixin, wuxu ku macneeyey kasbashada dadka 'sidii wax aan lahayn xuduudo ku wareegsan. Marka la isu eego, waxa weeye meel fog gaadh wax waliba ku guda jiraan oo macaamilo qudha wadaagsiisa dhinacyada daneeya ee leh awood ay sahal ugu fidaan aakhirikana saameeya kuwa kale oo fara badan.

1997kii Buugg Biritish ah, oo Xidhiidhinta Horumarinta la yidhaa, wuxu ku fasiraa kasbashada dadku:

Inuu yahay koox kasta oo qofaf ama ururro ka kooban kuwaasoo, sife is-ahaaneed, isu weydaarsada macluumaadka, shaqooyin wadajir ah qabta isuna nidaamiya iyagu inay hab ay misana xorriyaddii shakhsigu sideedii ahaanayso.

Dhawr qodob oo tafsiirkan ku jira ayaa muhiim ah in la xusuusto. Cilaqaadku waa is-ahaan, qabashada hawlo wadaage ah iyo saamayn la'aan madax-bannaanida inta kasbashada dadka ku wada-jirta. Starkey, dooddiisii ku saabsanayd in kasbashada dadku tahay aalad adeegsi horumarineed, waa ma guuraan, iyadoo aynaan fasirin dhamaan macluumaad is-weydaarsiga iyo iskaashiga wax-qabadka sida isku-xidhiidhinta. Amaba se, ma aha in hawlaha ay ka mid yihiin liistada cinwaannada waraaqo diridda iyo kuwa war-sideyaasha in loo qaato inay yihiin isku-xidhiidhin. Socodka kasbashada dadku waa mid aad uga xorsan ugana jiho-badan ah dhanka macluumaadka, afkaarta iyo khayraad isweydaarsiga kuwaa aynu raacinno geeddi-socodka is-gaadhsiinta caadiga ah.

Kutubta Taxanaha Waxbarashada Barron waxa ku jira Tusmaynta Hir-galka Ganacsiga oo ku saabsan Kasbashada dadka hir-gashay, oo ay mu'allifintu isku dayeen inay qoraan Tusmayntan dhamaanteed iyaga oo aan ka bixinnin fasir kooban oo iyagu u curiyeen kasbashada dadka. Si

kastaba ha ahaatee, way jireen fasilro ay ka bixiyeen dabeecado geedi-socodka leeyahay. Waxay yidhaahdaan, waxyaabo kale ka sokow “kasbashada dadku ma aha cilmi xaddidan mana aha cadad sugan oo shaqooyin la taaban karo iyo dabeecado ah. Waa geedi-socod adag oo aan joogsan weli-gii, oo kasoo unkama xididdo kala duduwan oo badanaaba ku samaysmay degaanno kala geddisan si loogu adeegsado ujeedooyin kala duwan.

Sidaad ka arki karto fasirradan, kuwa wax ka qora geeddi-socodkan waxay ku qaadataa waqti adag fasiraadda waxa micnaheedu yahay. Iyo weliba haddana, waxa u yahay qalad is-fidineed oo awood badan, gaar ahaanna, ilaa bilawgii internetka. Laga yaabaa metaal shakhsi uu dhowaan ka bixiyey shebekad-xidhiidhinta inuu inaga kaalmeeyo bayaaminta waxa micniheedu yahay.

Waxa aan la shaqayn jirey haweeney ka timid Bariga Slovakia oo ku hawlan Barnaamij Horumarin Miyi afar waddan ka socda oo uu maal geliyo Midawga Yurub. Waddamada barnaamijku kulmiyo midkood waa Iceland Markii ay maqashay in aniga iyo xaaskaygu aanu ku tegeyno Iceland fasax ayaamo yar ah, waxay e-mail u dirtay saaxiibad ay ku lahayd waddankaa si ula socodsiiso inay wax ka ogaato safarkayaga. Taasi waxay dhalisay inaanu caways farxad leh la qaadano saaxiibbo cusub oo aanaan haddii kale weligayo garan lahayn.

Wax yar horteed makrii aanu Hudheelkii Raykjavik ugasoo ambabixin dalka, waxaan la kulmay Laaji da’yar oo reer Poland ah oo xaaskiisu qalabka guryaha kasoo waariddo Bariga Yurub. Markii aan warsaday inay soo dejiso qalab madbakhyo oo samaysan, wuxu yidhi, “Maya, se laakiin waxa jira suuq cusub oo badeecadaha u furmaya”. Maa daama inankaygu ku jiro ganacsigaa ninkaa xaaskiisii iyo wiilkaygii ayaa immika xidhiidh toos ah wada yeeshay oo rajaynaya inay iskaa-shadaan. Hadda, waa kaa Shebekad-xidhiidhin. Amaba siday saaxiibkay Slovakia joogaa uu yidhaahdo, is-ku-xidhnaantu waa lahaanta saaxiib leh saaxiib kale.

Isku-xidhnaanta noocyadaas ahi waxay muuqdeen qarniyaal ah inkasta oo ay badanaaba ahaayeen mudnaan u gaar ah inta awoodda xukun iyo khayraadku gacantooda ku jiraan. “Inankii wanaagsanaa ee waagii hore” isku-xidhnaantii isla weynida ahayd ee kuwa ka baxa Jaamicadihii qadiimiga ahaa ee Yurub iyo Maraykan waxay ku xumaayeen xubinimadoodii dadka kale ka reebnayd iyo awooddii ay u lahaayeen inay isku-xidhnaantooda uga faa’iidaysan jireen sidii ay shaqooyinka ugu fiican u heli lahaayeen si ay u qabsadaan saaxadaha hoggaaminta siyaasadeed ee dallalkooda.

Nasiib wanaag, isku-xidhnaanaha aynu hadal-haynaa ma aha dar ay dad ka reebnani jiraan laakiin waa kuwo si badan loogu wada jiro una furan cid kasta oo karaysa inay wax ku darsado ama aqoon iyo afkaar raadis ah. Warka aan derbiyo ku xidhan lahayn awgii oo astaan u ah xidhiidho shebekadeed casriga ah, ayaa u suurto-gelisa isku xidheyaasha inay la xidhiidhaan kuwayawga kale ee xuduudaha ururkooda ka baxsan si ay isu-dhaafsadaan wararka, xidhiidho iyo xataa khayraad intaba. Awoodda shebekad-xidhiidhinta waxa aad kor ugu qaaday, sida runta ah, faafiddii Internetka. Awooddan casriga ah ee shebekad-xidhiidhinta ayaa ka hor-joogsatay xukun-maroorada iyo keli-talisyada inay xakameeyaan nololaha kuwa doonaya inay xor u noolaadaan. Waxay kaloo diiqad gelin kartaa, maareeyayaasha baahi aad u sarraysa u qaba inay xakameeyaan wararka soo gelaya iyo kuwa ka baxaya ururradooda. Xidhiidhiyeyaashu waa wadka keli-talisyada iyo buruqaraadiyadda.

SIDEE SHEBEKAD-XIDHIIDHINTA QOF U BARTAA?

Marka loo qaato in shebeked-xidhiidhintu tahay xirfad looga baahan yahay kor u qaadka fiditaanka urur, sidee qof yeelaa si uu uga bogto barashadeeda? Sharaxyo kala duwan oo hab-socodkan ku saabsan waxay uga muuqan kartaa inay sifaadka shakhsiyeed aad u muhim yihiin sida xirfad kasta oo kaleba oo uu bartaaba ugu tahay muhim horumarinta fiditaanka ururkiisa. Iyadoo ku salaysan waxa ay qabtaan kuwa iyagu la moodo inay yihiin xidhiidhiyeyaal shebekadeed najaxay, halkan waxa yaal qodobbo ku saabsan sida loo barto hab-socodka:

- Baro sidaad ugu kalsoonaan lahayd naftaada. Haddii ay u malayso inay sax tahay in la isfidiyo ku dhaqaaq oo u samee xidhiidh ururkiinna. Si kasta ha ahaatee, waxa loo hayaa daliillo badan inay leenahay awoodo rabbaani ah oo maskaxdeenna. Iska tirtir oo qashin qub ku rid.
- Yaanay ku niyad jebin haddii kuwa ugu horreeya ee aad la xidhiidhaa ku qanci waayaan ujeedooyinkaaga. Way dhacdaa, laakiin yay ku niyad jebin. Waxa laga yaabaa inaanay aaminsanayn in dadku runtii macluumaad iyo afkaar aanay xadhko daba xaabayaa jirin.
- Tani waxay soo jeedinaysaa in la barto casharka ku xiga oo qaali ah: niyaddii la imaw una sii diyaar ahow inaad dadka kale siisid xogo iyo afkaar aanay xadhko ku xidhannayn. Maalgelintani waxay dhab ahaan iskaga bixin doontaa saami mustaqbalka aad ka heshid kayd fikradeed oo meel kaa durugsan jira oonad weligaa maqlin. Waa sidan habka isku-xidhiintu u shaqaysaa.
- Qadder yar la fadhiiso qof uun aad rumaysan tahay inuu u leeyahay xirfad iyo waaya-aragnimo kasbashada dadka. Ka warayso waxay yeelaan marka ay ku kacayaan waxan dad u yaqaan kasbashada dadka iyo inay tafsiir ka bixiyaan guulihii iyo fashilaadihii ay kala kulmeen. Qaanuunka labaad ee kasbashada dadku waxa weeye inaad wax walba ogaatid, markaa wax walba ogaade noqo. Metelan, waxaad weydiisaa iyaga qaanuunkii koowaad ee kasbashada dadku wuxu ahaa maadaama aynu illawney. Haddii aad soo hesho, na soo ogeysii annagana.
- Ha kala warwareegin inaad waydiiso su'aalo maalaal yacni ah. Xirfaddani waxay qaadataa tajrubad wax-qabad oo adag mar haddii badankeennu aynu waqti dheer ka hor aynu soo barannay inaynu ula muuqan karno doqmo indhaha male-awaallada kale.
- Male awaale ha ka ahaan, ujeedooyinkaaga inaad rabtid cid kale ugu xidhan xog iyo fikrado awgood, arrimaha ku saabsan qofka aad rabtid inaad la xidhiidhid ama sababaha ula xidhiidhayso.

Kasbashada dadku waa ficilo is-ahaaneed oo ah hawl-galid wadaage is-leegaan ay darafyada uga danayn badan wax bixinta inay iyaga wax la siiyo. Way caddahay inay tahay xirfad wax isbarid ah iyo hab-dhaqan lagu barto wax-qabadka. Haddii kale, Machad Tababar kasta oo adduunka ka furani wuxuu ahaan lahaa mid bixiya diraadaha kasbashada dadka.

Shebekad-xidhiidhintu waa maaddad ay dad badan ku noqota niyad jab. Dhamaanna waxay u muuqataa wax muhmal ah. Haddana weliba malaayiin dad ahi waxay ku hawlan yihiin hab-socodka ay xaadirka nidhaahno Kasbashada dadka. Shakhsiyaad ku jira tani waxay ku hawl-geyayeen dariiqada ah "yeelashada saaxiib saaxiib kale leh" ee shebekad-xidhiidhintu muddo facyaal ah- Miliiniyamo! Isbeddelka weyn ee geedi-socodka ku dhacay waa dabecadaha caddaalad iyo dimuqraadiyadeed ee kasbashada dadka kuwaasoo ay sabab u tahay Tiknoolojiyada casriga ah ee

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

war-is-gaadhsiinta. Shaki kuma jiro in kasbashada dadku tahat qayb ma dhaafaan u ah dhisidda awoodda fiditaanka urur, markaa noo dul-qaad yeelo inta annu sharxayno laba sifaale oo lagama maarmaan u ah geeddi-socodka iyo waxa aad ka filan karto inay faa'iido ahaan kaagasoo hoydaan marka aad hawsha kasbashada dadka guda-gasho.

GOLE-KA-FUUL IYO XORRIYAD

Labada sifaalood, ayaa si kuwo kasta oo kaleba ka badan, asteeya geedi-socodka marka loo nisbeeyo ururrada adeegga beni aadminimo, oo ay qaar badani yihiin Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan . Labada sifaale waa Kudaalka iyo xorriyadda. Kudaal waa niyadda shakhsiyaad u leeyihiin inay gaadhaan waqti kasta oo ay doonaan, xaalad kasta oo tahay si ay u gargaaraan kuwa baahan. Xorriyaddu, dhinaca kalena, waxay weeye qiyam shakhsiyeed iyo tu hay'ad ahaaneed labadaba, oo khasab ah inay jiraan haddii la doonayo inay kasbashada dadka baahiyaha iyo khayraadku inay meel mar noqoto. Waxa ku jirta in si xor ah loo shaqeeyo, in si xor ah dib loo micneeyo xuduudaha hay'adeed iyo kuwa barnaamij si aad ugu munaasib ah ka jawaab celinta waqtiga baahiyi taagan tahay iyo in si xor ah awoodda loo wadaago, dad kasbashada iyo khayraadka asluub iskaashi oo aan cabsi-gelin lahayn. Waa gurmada degdegga ah iyo xornimada shakhsiga ku hawl-galo midda sida ugu wacan u muujisa metaalka farsamada kasbashada dadka baahiyaha beni aadanka iyo khayraadka.

Labada sifaale, haw-galka degdeg ah iyo xorriyadda, ayaa wada geeddi-socodka kasbashada dadka kana yeela wax soconaya oo xil-gud ah. Waxa weeye sifooyinka iyagu inta badan ka maqan hay'ado soo jireen ah oo buruqaraadi ah oo hawl-wadeennadoodu aqoon-leyda yihiin ee u xilsaaran inay ka qabtaan adeegyo badan oo beni aadminimo qaybo badan oo adduunka ka mida. Middaasi waxay siisaa Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan fursado naadir ah iyo imtixaanno sida ugu badan uga faa'iidaystaan adeegsiga farsamooyinka kasbashada dadka ay dariiqooyin casri ah iyo babac-dhigid ay ugu adeegaan beelahooda iyo dadkii xilka u egmadayba.

Hal istaraatejiyad weyn ah oo noqon karta farac dabiicad ahaan uga faafay kasbashada dadka waa abuuranka xulafuoyinka istaraateji ah iyo shuraakeyaal. Caqabadda babac-dhig u baahani waa samaynta is-bahaysiyadaas iyada oo aan la macmalin nuxurka tayada asaasiga ah ee laga yaabo inay tahay middii ay isugu yimaaddeen iyaga oo kasoo dhex dhalatay geeddi-socodkii kasbashada dad qaarkood. Waxaynu kaga hadli doonaa dhismaha xulafuoyinka istaraatejiga ah cutubka kan inoogu xiga.

Markaa sidaa ula soco!

SHEBEKAD-XIDHIIDHINTU WAA INAY ISTARATEJIYADIINA WAR-IS-GAADHSIINEED KA QAYB NOQOTO

Ma xusuusataa imtixaankii kadeedka ee Hercules, geesigii khuraafiga ahaa ee Giriigga? Waqti kasta oo uu gooyo sagaalkii madax ee Haydradii Jinka ahayd midkood laba ayaa dib ugu soo baxayey. Haddaba waa sidoo kale kasbashada dadku. Laakiin waxa jira sababo waaqici ah oo weliba hadhay.

- **Kasbashada dadka waxaynu ku hellaa xog, fikrado, kulanno iyo weliba khayraad** Mararka qaar waxaynu ku hellaa xogo xaddi badan iwm. Oo aynaan u baahnayn, laakiin taasi waa abaalgudka inaad ahaatid xidhiidhiye wanaagsan. Isku-shebeked-xudhiidhiyaha

fiican waxa kale oo uu yahay beer-wale wanaagsan, oo ka nadiifinaya haramaha Internetka inta aanu beerta la wareegin.

- **Kasbashada dadku waxay innaga caawisaa inay korodhsanno** aqoon, xirfado, aragtiyo qoto-dheer iyo qiyam.
- **Kasbashada dadku waxay inna siisaa taageero marka aynu u baahanno** jawaab, marka aynu saaxiib u baahanno, marka aynu u baahanno hagrid iyo marka aynu u baahanno dariiqo kale oo aynu shaqada u qabanno ee aynu ognahay inay jiraan halkeer innaga baxsan kuwo iyagu shaqadaa hore u so qabtay.
- **Isko u-shebeked-xudhiidhintu waxay inna siisaa tamar iyo haybad dad jiidasho** waxay innagu caawisaa inay helno dad kara inay furaan irridaha habboon, inoo noqon kara ladhey-aal ama qareenno, kordhin kara muuqaalkeenna, innagu caawin kara inaynu wax u qabanno hab ka wanaagsan kuwo aynaan abidkeenba ka fekerin inaynu samayn karno.
- **Kasbashada dadku waa safarka gebagebeeya sahaminta** xidhiidhiye-yaashu fudayd ayay u socdaalaan, weligood ma iibsadaan khariidadaha waddooyinka mana qaataan fiisooyin, cashuuro ma bixiyaan, safafna isma taagaan, shandadahoodana kama lumaan. Waxay karaan, haddii ay rabaan, inay dunida oo dhan socdaal joogto ah ku dhammeeyaan iyaga oo aan gurigooda ka tegin.

*Haddii qof kasta oo isku-xidhiidhintinna ku jiraa
adiga kula mid yahay, taasi ma aha isku xidhiidh-sanaan.*

Waxa weeye dundumo.

HARVEY MACKEY

Kasbashada dadku waxay qaar u tahay, dabiicad ahaanteeda, sifaale, xirfad, qiyam iyo weliba dariiqo nolosha lagu fasiro. Sababtaa li'ajligeed, way adagtahay in fasir go'an laga bixiyo isku-xidhiidhin waxa micnaheedu yahay iyo sidii ay ku dhaqan gashay. Haba ahaatee, had-dana waa istaraatejiyad muhiim ah in laga dhiirri-geliyo iyo in laga taageero Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan gudahooda. Waa dariiqo lagu baahin karo hantida aad leedahay iyo mid aad ku dhaqaajin karto kuwayawga ka baxsan xuduudda adigu xukunkaaga maareeye ahaan. Adigoo ku xisaabtamaya caqabadaha iyo fursadaha aad ku fahmaysid hab-socodka Kasbashada dadka, daqiiqado qaado dabadeedna ka qor tusaaleyaal adigu waaya-aragnimadaada mar ay adiga ama adiga saaxiibkaa aad u adeegsateen Isku-xidhiidhin dan uu ururkiinnu leeyahay iyo mid egmadeyaashiinnu leeyihiin awgeed.

Maxay yihiin qaar ficillada kasbashada dad ee aad qaadi lahayd si aad usii wanaajisid fursadaha fiditaanka ururkeenna u haysto?

QODOBBO MUHIM AH

- Saddex Istaraatejiyadood ayaa foolaad u ah doodda Dhisidda Awoodda Is-fidinta Urur: War-is-gaadhsiinta, Xulufadiisa, dad kasbashadiisa.
- Istaraatejiyadaha iyo xirfadaha war-is-gaadhsiintu waxay ku fidsan yihiin min dhegeysi-firfircoon ilaa kasbashada dadka iyo saldhigyo kaloo muhiim ah oo dhexeeya.
- Qorshe wax-ku-ool ahoor war-is-gaadhsiineed wuxu ka jawaabaa su'aalaha Waayo, Maxay, Ciddee, Goortee iyo Sidee buu ururkiinnu u baahan yahay inuu war-is-gaadhsiin la yeesho dano-wadaagyada muhiimka ah.
- Istaraatejiyadaha Is-gaadhsiinta Fiditaanka wax-ku-oolka ah waxa xuddun u ah dhegeysiga firfircoon. Inaad dhegeysato dadka hawshiinna ka faa'iidaysta iyo taageereyaashiinna. Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan waxay aad u wax-ku-ool noqdaan marka ay xidhiidh is-gaadhsiineed la samaynayaan dano-wadaagyadooda.
- Xidhiidho shebekadeed War-baahintu waa muhiim, laakiin waxaad u baahan tahay inaad isu miisaanto, qiimaha ay kugu kacayso iyo faa'iidooyinka ay kuu leedahay awood aad saarto sidaad war-baahinta uga muuqan lahayd.
- Kasbashada dadku waa shaqo gole-ka-fool iyo is-ahaan u dhaca si loo gaadho kuwa kale oo idinka baxsan oo laga raadsanayo war, baraarujin, kaalmo, fikrado, fursado shuraakenimo iyo horumar shakhsiyeedba.
- Kasbashada dadku waa istaraatejiyadda adeeg beni aadminimo ee ballaadhinta khayraadka caalamiga ah ee noqon kara kuwo waxtar aad ah yeesha, haddii loo helo tiknooljiyad casri ah iyo fahamka hab-socodkeeda.
- Kasbashada dadka wax-ku-oolka ahi waxay ku gaadhi kartaa dhisidda is-bahaysiyo adag. Taasi ku faro adayg!


TIXRAACYO (NOTES)

1. **Alessandra, Tony and Phil Hunsaker, Communicating at work, New York, Simon and Schuster. 1993, P. 54**
2. **Weaver, Richard and John Farrell, Managers as facilitators, San Francisco, Berrett-Koehler Publishers, 1997, P 137**
3. **Axelrod, Fred. Terms of Engagement. San Francisco: Berrett-Koehler 2000, P. 91**
4. **Fisher Fred. "Resources Exchange Networking Metaphorical inventions in Response to differentiated Human Needs in a Collective-Oriented Society" Volume 12, No.1 of Journal of Voluntary Action Research, Jan-Mar 1983**
5. **Seymour Sarason and others. Human Resources and Resources Networks. San Francisco: Jossey-Bass Publishers, 1977. P. 152.**
6. **Starkey, Paul. Networking for Development. London: International Forum for Rural Transport and Development. 1997. P. 14**
7. **Michelli, Deni and Alison Straw. Successful Networking. Hong Kong: Barron's Educational Series, 1977. PP. 1-8**

ABUURIDDA GAASHAANBUUR ISTARAATEJIYADEED

Cutubka 3

*Isu-imaatinku waa ballaysimid, wadajirkuna
waa hor-u-kac, wada shaqaynina waa guul.
MAAHMAAH CARBEED*



Abuuridda gaashaanbuur istaraatejiyadeed inay noqdaan istaraatejiyad fiditaan waxay ku dhacdaa meelo war-is-gaadhsiinta iyo dad kasbidda dhex ah. Gaashaanbuur iyo shirkado waxay yaalaa kasoo unkamaan dedaalka is-gaadhsiin iyo isku-xidhiidhin samaynta. Isku-xidhanka Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan kale amaba hay'adaha la maskaxda ah ay ku bahoobaan nooc ah xulufo istaraatejiyeed wuxuu yaalaa ku midho dhalaa kasbashada dadka oo korodha ama waxay sidaa u yeelaan darafyadu sidaa inay ku kasbaan kasbashada dadka u siyaadda. Xaaladaha sidan ah, waxa muhiim ah in istaraatejiyadaha fiditaan ee shakhsi looga fekerro inay yihiin wax isku wada xidhxidhan oo is-wada xoojinaya. (waxaad ka heli doontaa in siyaado ah oo ku saabsan sida loo abuurro gaashaanbuuraysiga Istaraatejiga ah Qaybta 2aad: Tools 6aad iyo ka 7aad.

Gaashaanbuur, iskaashi wax-ku-ool ah, shirkado, is-bahaysiyo– wax kasta oo aad doontaba iyaga ku sheegoo – waxay noqdeen mawduucyo iyo istaraatejiyo ku caan-baxay inay yihiin kuwa keenaya isbeddel iyo helidda inay wax qabsoomaan. Waxaanay u muuqdaan in loo cuskan karo dhamaan qaybaha kale ee bulshooyinkeenna hadday tahay qaybta guud, ta gaarka ama Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan . Qaarkood waxyaabaha aynu maqallaa waa mere hype oo lagu mudey hawo kulul oo wax kale se ku yar yihiin, markaa waxa faa'iido ah in la waajaho doodan iyada oo in shaki ahi jirto.

Metel ahaan, gaashaanbuur iyo shirkado isku biiray qaarkood waxay ahaayeen metello fashilaadeed, oo kiciyey in laga sameeyo diraaqo baadhis oon ahayn keliya, sidii aanay u wada shaqaynin balse sidii aanay u gelin wax ka badan dedaalkoodii inay sameeyaan gaashaanbuur. Waxa kale oo jira metello, dhab ahaan, ku saabsan in ururro kala kulmeen faa'iido ku gaadheen shaqo ay ku wada galeen is-bahaysi istaraatejiyadeed oo nooc ah. Bal aan isla aragno waxyaabaha ay ka odhanayaan khubaradu arrimaha ku saabsan karaanka abuurida is-bahaysiyada istaraatejiga ah.

Wax walba ka hor, shuraakeyaashu, iyo ficillada is-gargaarsadku waxa yaalaa loogu nisbeeyaa ama lagu xidhiidhiyaa dhismaha dan-wadaagta, kaasi waa war xiise u leh Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan . Waxaynu yeelaynaa inaynu kasoo qaadno madaxda Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan inay wada ayidsan yihiin Dan-wadaagnimada. Dhanka cibaadooyinka: awood, bogsiin iyo urur-beeleedba, Malidoma Patrice Some, hadal ku saabsanaa oo ay kaga tidhi beel, waa sidan:

Waxa qof waliba qirsan yahay in dhismaha beeshu yahay suurto-gelinta in wadajir lagu sameeyo waxa ah mustaxiil in keli la sameeyo. Beeshu waa meesha ay kasoo jeeddo xoogga aynu u baahanno isbeddel samayn. Waxaynu u baahannahay inaynu isu keenno fikradaha joogto u siyaadaya rabitaanka inaynu wixii saxa ahaa qabanno, innagoo aan xataa ogeyn sida wax loo qabanayo iyo meesha laga bilaabayo^{1, 2,3..3}.

Beeluhu waxay ku samaysmaan wada qabashada wixii mustaxiilka ahaa in keli la qabto. Wadajir qabashada wixii mustaxiilka ahaa waxay yaalaa noqotaa ama u xuubiibataa shariikado, gaashaanbuur iyo isbahaysiyo dhex mara darafyada ay khusayso ee Dan-wadaagta gudaheeda ah.

Frances Hesselbein, Guddoomiyaha Guddiga Badhasaabada Peter F. Drucker Foundation, ee Maaraynta aan macaash-doonka ahayn, waxay tidhaa:

Maalintii Shuraakenimadu way inna dul taagan tahay. Madaxda barata inay la shaqeeyaan shirkadaha kale ee waaweyn, wakaalado xukuumadeed iyo ururro ka hawlgala waaxyaha adeegga bulshada waxay kasban doonaan tamaro cusub, raad-reeb cusub, micne cusub oo ay leedahay shaqada ururkiisu qabto. ⁴

Hore ayey usii wadday iyadoo ku nuuxnuuxsanaysa shuraakahaasi, haddii ay yihiin kuwo dhex maray URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN ama CBO iyo Dawlad Hoose, Shirkad gaar ah iyo URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN ama hadday saddexda oo wadajira ha ahaadeene, waxay uga baahan tahay darafyada kala duwan ee shurkayga inay saamiyo fasirkoodu qeexan yahay ku leeyihiin mas'uuliyadda natiijooyin la qiyaasi karo leh. Laakiin, waxay ina xusuusinaysaa, inay waajib tahay madaxdoodu inay ahmiyad ku filan siiyaan ku dhiirradka inay iyagu horseed noqdaan.

Ka hor inta aynaan guda-gelin sida aynu uga gudbnayno dooddeenna ku saabsan gaashaanbuur samaynta, waxa kale oo jira hadal xoog ah kuna saabsan sida shuraakeyaal looga yagleelayo hir isaga gudba xuduudaha hay'adaha soo jireenka ah ee abidkood kusoo shaqaynayey kala wada qoqobnaanta.

Qarniga kow iyo labaatanaad wuxu noqon doonaa casriga gaashaanbuuraysiga. Casrigan gudhiisa, wax wada qabsiga ka dhexeeya ururro aan macaash doon ahayn (URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN /Ururrada Bulshada ku salaysan)iyo shirkadaha waaweyn baa kori doona dhinacyada xawliga iyo muhimadda istaraatejiyadeed. Cilaaqaadyada wax wada qabsi ayaa si u siyaado ah uga guuri doona habkii sama-falka soo jireenka ahaa ee ku astaysnaa Deeq-bixiye faddilan iyo deeq-hele abaal-haya ah oo u digo rogta Gaashaanbuur istaraatejiyad ku dhisan oo ka qoto-dheer. Is-beddelladaasi beryahaba way socdeen, muuqaalkana kala sar-rayntana durba waxa buuxiyey ganacsiyo iyo hay'ado aan macaash doon ahayn oo ku hawlan baadi doonka dariiqooyin cusub oo ay u wada shaqeeyaan, si ay u gaadhaan yoolalkooda, waxtarka bulshadana qayb uga qaataan.⁵

Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan oo badanaa waxay u yihiin noocyadaa gaashaanbuuraysiga ahi waxay u leeyihiin faa'iido ama haliso. Waxa kale oo ay dhex dhigaan Ganacsiyada iyo URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN iyo Ururrada Bulshada ku salaysan cilaaqaadyo aad u kala duduwan. Siduu James Austin inoo xaqiijinayo gaashaanbuuraysigaa inoogama baahna samayn qorsheyaal istaraatejiyado waaweyn; laakiin, dulqaad iyo adkaysi ayaa inagu filan si aynu bilawyo aad u yaryar ay ugu xuubiibtaan gaashaanbuur istaraatejiyad muhim ah leh.

FAA'IDOOYIN KASOO KORDHA IS-BAHAYSIYADA

Qaar ka mida faa'idooyinka ay Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan ka helaan gaashaanbuuraysiga, ay dhexdooda ka samaystaan ama ay la galaan shirkado iyaga ka baxsan, waxa ka mid ah:

- Kharash dhimid: Ururrada aan xukuumiga ahayn waxay aalaaba guulaan adeegyada, qal-abka iyo xataa shaqaalaha.
- Dhaqaale Miisaaman iyo ka qiyaasta: Metelan, xarumo xannaaneedka maalintii uun shaqeeya ee ay maamulaan Ururrada Bulshada ku salaysan madaxa bannaani waxay goosan karaan inay badeecadaha iyo adeegyada qaar cayiman jumlad ku iibsadaan, si uu qiime jaban ugu fadhiisato sicirka xabbada qudhihi.
- Wadar guul: Tani waa meesha ay laba urur ama ka badani oo leh awoodo is-iyo masuuliyado isu-kaabaya ay isku biirsadaan xoogagga, markaasoo ay maareeyaan wax-qabad ka badan intii ay kala gaarkood qaban lahaayeen. Dawladda Hoose, la shaqaynta URURRADA AAN

XUKUUMIGA AHAYN ama Ururrada Bulshada ku salaysan degaanka ku dhow, waxay oggolaataa inay iska kaashadaan Barnaamijka ka hortagga AIDSka. Xukuumaddu, metelan, waxay shaqaalaysaa kal-kaaliyaal u baahan inay ka shaqo galaan heer unugyada ugu hoo-seeya laakiin aan haysan fursad ay ku gaadhaan qofafka halista ku jira ama adeegyo ay ku shaqeeyaan. Marka ay isku xidhmaan xarumaha degaanka waxay maamulka magaalada siisaa fursad iyo adeegyo iyo Ururrada Bulshada ku salaysan oo ku dara adeegyada iyagu karaan inay u fidiyaan dadka ay magacooda huwan yihiin.

- Dakhli dhalin: URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN iyo Ururrada Bulshada ku salaysan badi waxay ugu xidhmaan hay'adaha gaarka ah inay helaan dakhligooda oo siyaado ugu soconaya si ay u gaadhaan dhaqaalahoodu inuu waaro. Waxay dhacda, metelan, inay ka shaqeeyaan xarumaha shaqo u tababarka qaybaha dhakhliga hooseeya ee degaannadaa ama waxay ka hawllan yihiin adeegyada gaadiidka sicir jaban ee ssacad saacad isweydaar shaqaalaha qaar u geeya qaarna kasoo qaada warshadda. Adeegyadaa waxa lagu qaban lahaa in qandaraas lala galo shirkad caalami ah oo u baahan shaqaale xirfadley ah iyo gaadiid la isku hallayn karo si loo xaqiijiyo shaqaalahooda xaafado gaar ah deggani inay ka soo gaadhi karaan waqtiga shaqada.

Shirkadaha iyo ganacsiyada gaarka ahi waxay ka faa'idaan gaashaanbuuraysiga ay la galaan Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan , haddii kale, may dhacdeen inay daneeyaan wax la qabsigooda. Qofafka ganacsatada ahee xariifka iyo hawl-karka ahi waxay mar walba isweydiiyaan, "Maxaa inoogu jira ee inoo geynaya inaynu dhex galo"? Inkastoo laga yaabo in aan su'aasha loo odhan si furan waxay saamayn doontaa go'aankooda kama dambaysta ah. Iyada oo ay qaar badan oo innaga ahi qabaan inuu macaashku yahay sababta qudha ee ururrada qaybta gaarka ahi wada shaqayn ula yeeshaan Dawladaha Hoose ama ururrada qaybta saddexaad, waxa jira sababo kale oo muhiim ah, iyo Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan inay iyana ka faa'iidi karaa inay iyaga fahmaan. Waxa kuwaa ka mid ah:

- Hawl-gal Istaraatejiyad ku dhisan: Yaalaa shirkadaha qaramada-badan laga leeyahay iyo weliba ganacsiyada maxalliga ahi waxay ku dhex daraan dhismaha qorsheyaashooda istaraatejiyadeed qiyaaso ballaadhan inay ku hawl-geli doonaan beesha ay ka ganacsadaan dhexdeeda. Qaarkood waxay xataa sameeyaan inay adeegyada bulsho ka dhigaan qaybo dhan oo qiyaasta wax qabadkooda ugu jirta.
- Maaraynta Cududda Bini aadmi: Hawl-wadeenno wax oddorosa oo badan ayaa u arka ka hawlgalka beesha inuu yahay faa'iido biirta oo kor u kicisa higsigooda iyo niyaddooda. Maareeyayaasha iyo aqoon-yahannada ayaa u arka fursadaha tabarruca lagala qaybgalo Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan inay tahay qayb muhiim ah oo ka mid ah iyaga horumarintooda xirfadeed, ballaadhashada haybaddooda beesha dhexdeeda marka wada macaamil dhex maro muwaadiniin kala waayo nololeed duwan iyadoo loo bandhigayo xaalado leh fursado iskaashi madaxdu yeelato.
- Hab-dhaqan Abuur: Tirooyin sii kordhaya oo shirkado ah, wuxu adeegga bulshadu u noqday qayb ku dhafan hab-dhaqankooda urur. Waxay ka caawisaa inay habeeyaan iyo inay xoojiyaan nuxurka qiyamka laf-dhabarta u ah guulaysiga ganacsigooda.
- Fursado Ganacsi: Adeegga bulsho wuxu ka caawiyaa dhisidda xidhiidho qiime leh in lala

yeesho beesha iyo meelo ka baxsanba. Waxay u dhistaa sumcad, waxayna u fidisaa xidhiid-
hadoo, cilaqaadyadooda iyo suuqya-doodaba .

*Ku kaalmee doonta walaalladaa inay soo
tallawdo, iyo toodii xeelligii bay soo gaadhey.*
MAAHMAAH HINDI AH

Noocyada Is-Bahaysiyada

Gaashaanbuuraysigu waxay u samaysmaan noocyo badan. Bal aan isla eegno dhawr hab tafsiir ah oo loogu kala saaro noocyo:

Robert Hargrove, mu'allifka qaybidda farsamada iskaashiga wax-ku-oolka ah, wuxuu ku yidhi, inta badan iskaashiyadu waxay kala hoos yimaadaan noocyada so socda midkood.

- Iskaashiyo idman: Qof uun kale, wax kasta oo ay sababtu ha ahaatee, oo yidhaahdo “waa inaad wada shaqayn lahaataa.” Marka uu bixinaayo metaallo firfircoon, gaashaanbuuraysigaa la isku dukhuulay waxay yaalaa la’aan karaan dabkii darbanaan ee ka yimaadda inaad qayb ka ahayd go’aankii lagu gaadhey in lays iskaashado.
- Iskaashiyo is u dhalad ah: Kuwani yaalaa waxay kasoo dhashaan ama dhibaatooyin ama fursado markaasoo hal ama darafyo badan ay sahlayaan inay fidaan kaalmo darteed ama qayb ka helaan war cusub.
- Iskaashiyo dano khuseeyaa kulmiyaan: Tani waxay noqon kartaa wax fudud sida badbaadinta dhirta jidka weyn ku taalla ama wax adag oo sida shaqada AIDSka dilaaga ah.
- Iskaashiyo lama filaan ah: Kuwani waa iskaashiyada kasoo dhex dhasha kulanno nasiib ah, halkaasoo ay shakhsiyo ka ogaadaan in laba daraf ee ay metelaan haysta fursado ay isugu yimaadaan si ay wax u dhaqaajiyaan.

Rosabeth Moss Kanter, wuxuu ka gelayaa dhinac taa aad uga fog isagoo u kala soocaya noocyada dedaallada iskaashi isaga oo u kala dhigaya dhinac ah tamar yar fog ah iyo dhinaca kale oo dar xoog ah oo dhow. Dhinaca ugu fog kuwa tamar-yar, waxa yaal, nooca gaashaanbuur ee kasoo kora jiritaan baahi adeeg wadaage ah. Kuwani waa ururro isku jaad ah oo qabta shaqo isku mid ah ama meel ka wada shaqeeya oo isku biirsada hantidooda si ay u gaadhaan yoolal ama himilooyin ay wadaagaan. Ururrada aan xukuumiga ahayn , Xukuumado iyo Hay’adaha samo-fal oo Caalami ah ee la wada hawl-gelaya hab qaybin cunto gargaar ahi waxay noqon karaan metaalka dalladda adeeg wadaage ah.

Labada nooc u dhaxaysa waxa yaal ururrada mid waliba u baahan yahay awoodda iyo khayraadka ka kale si uu u najaxo, xaaladihii u hagayey isku biirka, metel ahaan, Golaha Magaaladu waxa ku goostay inu u baahan yahay inuu guryo usii sameeyo tirooyinka sii kordhaya ee dadka guryaha la’ magaalada dhexdeeda. Dhismeyaal ay leeyihiin oo aan looga faa’iidaysan si buuxda waxay qabaan inay kefeyn doonto laakiin ma laha shaqaale ama khibrad ay ku cusboonaysiiyaan ama ay ku maamulaan guryaha isla marka la cusboonaysiiyo. Qandaraasle dhisme oo maxalli ah ayaa ku caanbaxay intuu iibsado guryaha kirada jaban ee xidhifka dambe ee duleedka magaalada inuu ku khasbo dadka masaakiinta ahaa inuu ka raro oo jidadka kusoo daadsho. Isaga oo raba sumcaddii ka dhimatay inuu dib usoo nooleeyo wuxu aqbalay inuu dib u cusboonaysiiyo guryaha magaalada si uu kalsoonida dadweynaha usoo ceshado. URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN weyn

oo magaalada deggan oo horeba u wadey mashruuc fican oo guryaynta dadka guryaha la' oo rabey inuu shaqadiisa ballaadhiyo laakiinse lacagta iyo adeegyadu ku yar yihiin. Iyagoo saddexda daraf aqoonsan dhamaantood inay ku gaadhi karaan hadafyadooda iyaga oo iskaashada, oo ay samaystaan is-bahaysi si ay ugu adeegaan tirada sii kordhaysa ee dadka guryaha la'. Waxay sameeyeen shirkada wadajir ah si ay qorshahoodu uga dhigaan mid shaqo-gala ah.

Kanter wuxu yidhaa is-bahaysiga u xooggan una dhow ee la sameeyaa waxay yihiin nooca shuraakooyinka silsiladda-qiimaha, sida cilaaqaadyada badeecadleh iyo macmiisha oo kale. Metelan, urur badeecad keena ayaa u baahan kara inuu ku xidhmo urur ka duwan si uu u hubiyo in qaabka iyo dayac-tirka badeecadda ay gadaan loogu xaqiyo macmiisha. Labadaa urur way isku xidhmaan si u abuuraan qiime u siyaada isticmaalaha ugu dambeeya, sidanbaa loogu tixraaca silsiladda-qiimaha. Xoogga noocyadan is-bahaysiyo ama gaashaanbuur ahi waxay ku wada jiraan shuraake ku heshiis ah dhawrida cilaaqaadka, isku-mid ahaanta hawl-galladooda oo furta rajooyinka fursado is-daba joog ah oo kasoo maaxda cilaaqaadyadooda marka ay midkoodba mid taageerto.

Cilaaqaadka aan la leeyahay UN-HABITAT iyo Partners Romania Foundation for local Development(FPDL) iyo cilaaqaadyada Foundationku silsilado isku xidhiidhsan oo Machadyo tabar oo ku yaal Badhtamaha iyo Bariga Yurub, waxay meteshaa xayn shuraakeyaal silsilado-qiimeed ah. Aniga ayaa sameeya Qoraalka bilawga ah(Wax soo saar) oo ay la socoto Lacag ka timi UN-HABITAT, taasoo inta badan yaalaa, ka hessa maal-gelin ilo meelo-yaabo kale ah. Alaabada, xaaladan, waxay FPDL u isticmaali doontaa gundhig inay uga dhigto Tababar Goboleedka Tababareyaasha, macaamiisha foudnationka loogu tababari doono shaqooyin meelo iyo qalabyo cusub oo ay u adeegsan doonaan wada shaqaynta dadka ay metelaan. Silsiladda qiimuhu waxay isku xidhaa ganacsade gaar ah, Hay'ad caalami ah, URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN heer gobol ah iyo adeeg fidiye maxalli ah.

Waa arrin xiiso leh, ayaad odhan, Laakiin sideebay Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan u heli karaan faa'iidada fikraddan iyo istaraatejiyaddan? Maa daama akhriste waliba leeyahay noocyo duruufo iyo fursado ah oo u goonni ah, marka ay tahay dhanka abuuridda Is-bahaysiyo istaraatejiyadeed, tani waa su'aasha qudha ee aad ka jawaabi kartid? Si aannu kuugu caawinno inaad la tacaasho waxa aannu u malaynayno inuu yahay qiso xiiso u leh Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan , bal aan isla yara eego sida qaybta dhaqaalaha gaarka ahi u gaadhaan go'aannadan.

Kasoo qaad inay shirkaddiina yari hadda u heshay dawo cusub AIDSka. Waxad doonaysaan inaad badeecadda suuqa gelisaan, laakiin waxaad hore u ahaydeen shirkad u badnayd cilmi baadhid. Waxaad ogsoon tihiin inay qiime badan ku kacayso, waqti badan idinka qaadanayso, xaqiiqo ahaanna noqon karta khatar inaad ku wada qabataan hawsha silsiladda-qiime dabo ilaa dactal min ikhtiraacidida iyo samaynta badeecaddiina cusub ilaa iyo ganacsi gelinta ururkiinna dhexdiisa. Adiga oo maleyaashaa ku salaynaya, tijaabi mid walba oo tallaabooyinka iyo geeddi-socodka silsilad-qiimeedka ka mid ah iyo inaad ku samayso waxay khubaradu yidhaahaan falanqaynta samayn/iibsi mid kasta.

Adigoo ku salaynaya falaqaynahaa, waxay go'aansataa inaad iibsataa inay ka fican tahay, ka khatar yar tahay, kana dhaqso badan tahay inaad adigu ku samaysid ururkiinna dhexdiisa wixii awooddo ahaa ee warshadayn, kaydin, qaybin iyo iibgeynta badeecaddiinna cusub looga baahnaa oo dhan.

Adiga oo ka raacaya falanqaynaha samayn/iibsi, waxa aad ogaanaysaa awoodaha xuddunta u ah ururrada aad doonayso inaad xulufaysato. Tallaabooyinka geeddi-socodka ee ay ku wanaagsan yihiin iyo meelaha ay ka gelayaan silsilad-qiimeedkaagu min shaybaadhka ilaa macmiilka u dambeeya. Dariiqadan, waa mid u suurto-gal ah shirkaddiinna yar ee cilmi-baadhiseed in ay maarayso geeddi-socodka oo dhan iyada oo aan toos u qoranaynin tiro badan oo shaqaale ama dhisin dhismeyaashii loo baahnaa inay qaadaan qaybaha kala duwan. Waxay idiin gacan bannaanaynaysaa in shirkaddiinna yar iyo shaqaalihii inay sii wataan qabashada wixii ugu wanaagsanaa ee ay qaban jireen, oo ah ikhtiraaca badeecado cusub. Tani waa waxa uu yahay micnaha abuuridda meherad taraqiday leh, waa midda adeegsata aqoonta cilmiga, xirfadaha iyo waaya-aragnimada shuraakeyaasha iyaga dibadda ka ah halkii ay kooda ku koobnaan lahaayeen.

*In aad guulaysato khatar la'aan Waa
adigoo guulaystey sharaf la'aan.
CORNEILLE, THE CID, 1636*

Waxaynu soo bandhignay fikrado iyo istaraatejyado muhiim ah oo ku saabsan abuuridda gaashaanbuur shaqeeya waxaan dareensahay inaad wax ka faa'iidi doontid marka aad yara calaaliyo, inta aynaan hore uga gudbin. Qaado daqiiqado yar in aad u fiirsato ururkiinna, inta uu doonaba ha yaraadee, iyo jaranjarrooyinkii aad usoo marteen gebagebaynta badeecaddii ama adeeggii ugu wanaagsanaa, min bilawgii abuuriddeeda ilaa ay gaadhey isticmaalkii macmiishiinna. Hoos ugu kala jebebi geeddi-socodkii hawsha tallaabooyin iyo geeddi-socod hoosaadyo muuqda. Marka aad si bayaan ah u sharaxdid tallaabo walba, ku dhaqaaq inaad ku samaysid falanqayn samayn/iibsi midkood walba. Tallaabada ugu dambaysaa waxay tahay inaad heshid inuu jiro shuraake la filayo inuu qabto qaybo ka mid geeddi-socodkaaga si la mid ah sida aad u waddo ama kaba sii fiican, oo u keeni karta ururkiinna faa'iido xasil ah iyadoo aanay tayadii iyo shaqadii lagu keenayey badeecadda. Ma qaadan doonno dhulkii loo baahnaa in lagu sameeyo falanqaynta, laakiin waa kuwan su'aalihii laga jawaabi lahaa.

- **Waa maxay geeddi-socodyada iyo tallaabooyinka aynu qaadno xaadirka si aynu adeegyo iyo badeecado ugu fidinno macmiisheenna? Waxaad u baahan tahay in aad feejignaatiid astaynta dhamaan jaranjarrooyinka iyo dariiqooyinka aad immika maarayso si aad shaqada uga baxdo. Tan waa inay shaqooyinka gudaha iyana ku jiraan. Metelan, waxa laga yaabaa inay kaaga qiime jabnaato inaad qandaraas ku bixiso baahiyahaaga xisaabaadka maaliyadeed.**
- **Maxay tallaabooyinka iyo dariiqooyinka aynu ka qaadan karno shuraakeyaal kale ee inoo kordhin kara firfircooni iyo wax-ku-oolnimo inaynu ugu adeegno egmadeyaasheenna oo aanay uga imanayn saamayn nuqsaneed ururkeenna ama cilaaqaadyada aynu la leennahay egmadeyaasheenna.**
- **Ayaynu la gelaynaa is-bahaysi si aynu u fulinno tallaabooyinkan iyo geedi-socodyadan? Xusuusnow: Waxaad u baahan doontaa inaad heshid ka sax inoo naasiba xag waajib, qiyam, baahiyo iyo hawl-karnimoba.**
- **Waa nooc ee isbahaysiga, shuraakaha, ama iskaashiga ay tahay inaynu galno? Ma shuraakenimo buuxdaa? Ma heshiis iibsi adeegbaa? Mise waa mucaamalo nooc kale ah?**
- **Waqtige bay tahay inay ka fekerno gelidda isbahaysiga noocan ah?**
- **Sidee buu uga shaqayn doonaa dhab ahaan waaqica? Tani waa su'aal ku adag in laga jawaabo, laakiin lagama maarmaan u ah marka ay taagan tahay inay cid kula**

- shuraakowdo gudashada waajibaadkaaga iyo hadafyadaada.**
- **Mar labaad haddana, maxaynu isku deyeynaa inaynu ka dhex fushanno marka aynu cid kale la gelayno is-bahaysi**

*Ereyo qiiro lihi ma dhisi karaan is-bahaysi mana ilaalin
karaan, shaqo dhab ah keliya ayaa taa heli kara.*

JOHN F. KENNEDY

SIDDEEDDA “I” IYO TODDOBA “C” EE ABUURIDDA IYO WAARINTA ISBHAYSI WAX-KU-OOL AH

Dhismaha awoodda fiditaanka in loo dhex maro Is-bahaysiyo istaraateji ah waxay u noqon kartaa wax yididiilo iyo midho-dhal ah Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan . Waxay kaloo noqon karaan inay halis keenaan iyo inaanay midho-dhal noqon. Sidii uu Walt Disneyo yidhi, “Waa wax lagu qoslo in la qabto wax mustaxiilka ah”. Si aan idiinku caawiyo inaad mustaqbalka dhisataan is-bahaysiyo ka yara khataro yar kana midho-dhal badan, waxaannu doonaynaa inaannu ku xidhno doodan laba rabdadood oo ah dariiqo oo ay dejiyeen Rosaland Moss Kanter iyo James Austin, oo labaduba borofasoorro ka yihiin Dugsiga Ganacsiga ee Harvard oo ku caan ah laguna ixtiraamo allifaadda iyo ku shaqaynta farshaxan dhismaha is-bahaysiyada istaraatejiga ah.

SIDDEEDDA ”I” EE KANTAR U DEJIYEY ABUURIDDA URURRO HANA-QAADA

Wanaag Fardi ahaaneed. Shuraakeyaal oo dhammi waa xoog waxaanay mid mid u leeyihiin wax qiime leh ay kusoo darsadaan Is-bahaysiga. Qasdiyadoodu waxa u yihiin kuwo firfircoon doonista inay sameeyaan cilaaqaadka cusub.

Muhimadda. cilaaqaadku wuxuu muhiim u yahay shuraakeyaasha oo idil. Waxay doonayaan inay ka dhigaan wax shaqeeya.

Isku-tiirsanaan. Shuraakeyaasha way isu wada baahan yihiin. Waxay so galaan cilaaqaadka iyaga oo sita hantiyo iyo xirfado is-kaabaya si ay hir-geliyaan waxay kari waayeen inay keli qabtaan.

Maal-gelin. Way is-wada maal-gashadaan si ay u muujiyaan danaha ay ka leeyihiin cilaaqaadka. Maal-gashiyadani waxay noqon karaan lacagnimo, khayraad farsamo, lahaansho-is-weydaarsi iyo MYRIADS waxyaabo kale oo qiime leh si ay isugu muujiyaan kalsoonida muddo dheer ay isku qahaan.

Xog. Xogaha iyo afkaarta si badheedh ah ayaa loo wadaagaa.

Is-dhex-gelid. Waxay abuuraan xidhiidho badan oo ay ku wada shaqeeyaan ashkhaas badan iyo unugyada shaqada heerarka kala duwan ee ururradooda.

Hay’ad dhis. Waa erey weyn! Micnaheedu wuxu yahay cilaaqaadkaa la siiyaa martabad rasmi ah oo leh mas’uuliyadaha qeexan ee shuraakeyaasha iyo geeddi-socodyada go’aannada oo aan madmadaw lahayn.

Karaamo. Hab-dhaqan ay iskula wada shaqeeyaan waa mid ixtiraam leh, sababaysnaan leh iyo kor u qaadka is-aaminaadda.

Toddobada (C) ee Austin u dhigay Iskaashiga Istaraatejiga ah

- **Ku-xidhnaanta qasdiga iyo dadka.** Isbahaysiyadu waxay guulaystaan marka mudanka dadka talada hayaa ay shakhsiyan ugu xidhmaan iyo iyaga oo niyad ahaan midba midka kale ku xidhmo ayna ku xidhmaan danta ay ku shurkeen.
- **Qeexnaanta Qasdiga.** Dadka ku shurka is-bahaysiyada oo dhammi waa inay faham qeexan u leyihiin sababta ay u gelayaan shuraakenimada. Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan , sababta ah dabiicadda wanaaggooda bulsho awgeed, waxa debec-sanaan karta habkii looga baahnaa dejinta hadafyo qeexan iyo natiijooyin la qiyaasi karo oo fahir ka bixiya nuxurka is-bahaysigooda. Waa in aad ka lahaatid hadaf qeexan iyo natiijooyin aad sii qorshaysay iskaashiga.
- **Isku-soo dhaca waajibaad, istaraatejiyadeed iyo hab-dhaqanka.** Ururrada Shuraakoobayaa waxay u baahan yihiin inay ka feejignaadaan unugyadaa asaasiga ah iyo inay ogaadaan meelaha ay iskaga xidhmayaan waajibaadyada istaraatejiyadaha iyo hab-dhaqankooda. Isku xidhmaddu hadba sida ay isugu dhowdahay, ayay ku xidhantahay weynaanta fursadaha u jiri kara darafyada oo dhammi inay ka faa'iidaan cilaaqaadka. Iskusoo dhaca buuxaa, waa, si kasta ha ahaatee, yool aan waaqica uga suurto-gal ahayn dadka shurkey dhexdooda, haddii kale, siday u shuraakoobeen? Wixii la raadinayey wuxu yahay inuu wanaag iyo degganaansho munaasib ahi dhexdooda ka jiro.
- **Qiime Abuur.** Qiime waa wax aad uga fog lacag. Austin wuxu ka hadlayaa abaabulid iyo isku darid khayraadyo iyo awoodo tiro badan si loogu dhaliyo shurkeyaasha oo dhan faa'iidooyin iyo si qiyam bulsho loogu dhiso bulshada.
- **Wada xidhiidhka shurkeyaasha dhexdooda.** Wada xidhiidhka wanagsani waxa looga baahan yahay dhismaha is-aaminaad, is-aaminaadduna waa xabagta aan la taaban karin ee isku dhejisa is-bahaysiyada.
- **Wax-barasho joogto** Shuraakooyinku waxay u baahan yihiin inay fursado isma-taag ah u noqdaan korriimada iyo horumarinta shakhsi ahaaneed iyo kuwa hay'ad ahaaneedba heer kasta oo wada macaamil ah.
- **U daacadnimada Shuraakenimada.** Is-bahaysiga istaraatejiyad ku dhisan waa in loo arkaa inuu yahay cilaaqaad qoto-dheer, ee aanu ahayn arrin mar qudha ah. Shurkeyaashu waxay u baahan yihiin inay u go'naadaan cilaaqaad muddo dheer iyo waaritaan leh oo ay ku ladhan yihiin rajooyin iyo xisaabtan wadaage ah.

Labadan nooc ee shuruudaha shuraakoobidda meelo qaar way iskusoo dhacaan meelo kalena way ku kala leexdaan. Marka la isku biiriyo, waxa ay metelaan khariidad waddo ay u adeegsadaan hagidda Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan maanka ku haya inay is-bahaysiyo istaraatejiyad ku dhisan iyadu wada galaan, inay dawladaha hoose la galaan amaba shirkado gaar ahaaneed. Sidii aynu ugu so tilmaannay bilawgii doodda ku saabsan iskaashiga, qarniga 21naad wuxuu noqon doonaa qarnigii xulufuoyinka.

Sida uu Kanter inna xusuusinayo, cilaaqaadyada ugu wanaagsan ee ururrada isaga tallaabaa, badanaa waa kuwo murugsan oo caaddifadaysan, oo huwan dareenno xagga samayska iyo is-aaminaadda. Mana aha in si fudud loo galo. Keliya cilaaqaadyada lagu galo daacadnimo buuxda oo dhinacyo oo dhammi la yimaadaan ayuunbaa waari kara muddo dheer oo ku filan inay ugu abuuranto qiyam shurkeyaasha oo dhan.

QODOBBO MUHIIM AH

- Farsamada ay u sameeyaan gaashaanbuur Istaraateji ah Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan waa isku jirka hab-socodyada war-is-gaadhsiin wax-ku-ool ah iyo dad kasbadka inay ku fidiyaan xuduudaha ururradooda dhaafsiisan.
- Gaashaanbuur lala samaysto Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan kale iyo weliba ururro waaxyo kale oo bulshada ah ka socdaa waxay kuu dhali kartaa kharash kuu dhigma, dhaqaale miisaaman, awoodo biirsi, iyo xataa helid fursado dakhli dhalineed oo kuu siyaada.
- Shirkado waaweyn iyo ganacsiyo gaar ah ayaa danayn sii kordhaysa u haya inay sameeyaan is-bahaysiyo saldhigyo beeled sababaha soo socda awgood. waxay u faa'iideeyaan dedaallada qorshayntooda istaraatejiga ah, korodhka dariiqooyinka tayada maarayntooda khayraad dad, kaalmaynta inu u dhismo Hab-dhaqan ururo oo firfircoon, helidda fursado ganacsi uga kordha.
- Gaashaanbuuraysiga siyaabaha ay u samaysmaan waxay u kala baxaan dhawr nooc oo iskaashi ah, sida egmasho, iskii-u-dhisan, dano mid ah wadaag u jeed, iyo xataa isku-biirid nasiib uun ku dhacda.
- Ficilada gelidda gaashaanbuur waa inay ka horraysey wada-hadallo qoto-dheer oo ay wada yeesheen dhamaan darafyada midoobi doonaa.
- Gaashaanbuuraysiga taabba-galka ah waa inay ku dhisnaadaan shuruudaha soo socda: wanaag is-ahaaneed, ahmiyadda, isku-tiirsanaan, wadaag maal-gelin shirkado kale.
- La, xog, midaw, dhisme hay'adeed iyo karaamo iyo weliba xidhiidh shakhsi amaba ujeeddo caddaan, waajibaad, isku so dhac istaraatejiyadeed, abuuritaanka qiyam, war-is-gaadhsiin, waxbarasho joogto ah, iyo u darbanaan.
- Waxaynu gelaynaa casrigii Gaashaanbuuraysiga. Taasi waxay u noqon kartaa war yididiilo leh Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan ama sida suurto-galka ah, war xun haddii Gaashaanbuuraysigaa samaysmay kharribmaan.


TIXRAACYO (NOTES)

- 1. Some Malidona Patrice, Ritual Power, Healing and the Community, Portland, Swan-Rave Publishing, 1993.**
- 2. Hesselbein, Frances. The circular Organization. In Frances Hesselbein and others (eds). The Organization of the Future. San Francisco. Jessey-Bass. 1997. P. 83.**
- 3. Austin, James. E. The Collaboration Challenge. San Francisco: Jossey-Bass, 2000, P.1.**
- 4. Ibid. PP, 8-14**
- 5. Hargrove, Robert. Mastering the Art of Creative Collaboration, New York, Businessweeks books, 1998. P. 129.**
- 6. Kabter, Rosabeth Moss. Frontiers of Management. Cambridge. Harvard. Business Review. 1997. P. 226.**
- 7. Geeddi-socodka waxa loogu sharxay dariiqo cad oo aan madmadow lahayn buuggii Daniel Tobin, ee ahaa barashada digo-rogadka. Dib ugu cusbooneeya shirkaddiina cilmiga iyo xirfadaha. New York: John Wiley and Sons, 1966.**
- 8. Kanter, P. 246.**
- 9. Kanter, P. 245.**

ISTARAATEJIYADAHA IYO XIRFADAHA KASABASHADA DADKA

Cutubka 4

*Udgoonka ubaxu wuxuu ku faafaa agagaarka u dhow;
Qof wuxu yahayna waxay gaadha buuraha shishadooda.
MAAHMAAH NEPALI AH*



Kordhinta sumcad helidda Ururrada aan xukuumiga ahayn ama Ururrada Bulshada ku salaysan gudaha ku wajahan waa mawduuc iyo hawl muhiim leh. Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan maxalliga ah badankoodu ma laha saldhig siyaasadeed rasmi ah mana filan karaan inay tijaar ku noqdaan ama inay ku yeeshaan awood dad jiidasho oo ku salaysan urursadka khayraadka la taaban karo. Haddana weli, Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan badan baa leh awood siyaasadeed dad jiidasho oo muuqata iyo iyaga oo wakiil ka ah khayraad aad u qiime leh. Saldhigooda siyaasadeed wuxu qayb ahaan yahay mid ku fadhiya salka dadka ay metelaan, qayb ahaan khabiirnimada iyo shebekad xidhiidho shebekadeed ay leeyihiin-haa, shebekad-xidhiidhin iyo waxyaalo kale oo badan. Khayraadkoodu keliya ma aha had iyo jeerba mid lacageed laakiin, haba yaraatee, waa weyn yahay marka ay tahay xagga kartida ay u leeyihiin inay kuwa kale soo jiitaan. Khayraadku wuxu ku yimaaddaa noocyo badan.

Dooddii Nakuru waxay miisaan aad u weyn siisay dhawr istaraatejiyadood oo ay yidhaaheen waxay muhiim u yihiin sidii aad u yeelan lahayd haybad dad jiidasho ururro ahaan. Kuwaa waxa ku jirey: Siyaasadda falanqayn iyo i dejin, xirfadaha loo ololeeyo si loo adeegsado cududaha siyaasadeed iyo geeddi-socodyada haloosiga iyo hab fikirka istaraatejiga ahi sida ay u waafaqayaan yeelashada awood dad kaxaysi dheeraad ah. Dhamaan doodahoodii ku saabsanaa waxa loo baahan yahay si ay awood dad kasbasho weyn u yeeshaan URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN iyo CBO ahaan, dooddii Siyaasadda ayaa ahayd ta ugu wanaagsan. Dooddu waxay bixisay ra'yiga ah in siyaasado-bulsheedku, ama la'aanta siyaasado-bulsho, qaar badan oo madaxda URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN /Ururrada Bulshada ku salaysan ah waxay ku yihiin cabbudhin aada. Sidii uu yidhi ka-qayb galeyaasha midkood, "Waa maxay Siyaasadi? Markeebay siyaasadi noqotaa qaanuun? Iyo waa kuma gaadh-hayaha siyaasadi marka ay timaaddo?" Wuxuun bay ahaayeen su'aalo ku celcelis ah oo soo jeediyey inay hab-socodka siyaasadda bulsho gebi ahaanteedba tahay mid murugsan.

Bogagga dhawrka ah soo xiga, waxay isku deyi doonaa inay ka xayuubinno shaqalka ku gedfan hab-socodka Siyaasadda ee la xidhiidha sida Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan ay ugu yeelan karaan kasbashada dadka dheeraad ah xayndaabka go'aan qaadashada beesha. Waxa kale oo ay kasii gudbi doonaa xadka dhuuban ee ah istaraatejiyada kasbashada dadka ee ay ku soo dejiyeen ka qayb-galeyaashu Dooddii Qiimaynta ee Nakuru. Si loo ballaadiyo doodda iyo noocyada kasbashada dadka ee u bannaan Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan, waxaynu u baahannahay inaynu ka mugdiga ka saarno waxan loogu yeedho dad so jiidashada iyo inaynu uga doodno qaab ah sida ay xidhiidh ula leedahay qodob kale oo had iyo jeed si baaxad leeg loo adeegsado. Oo ah **AWOODDA**.

Ereyga awood dhif ayaa lagu isticmaalay, haddiiba ay dhacdo, dooddii ku saabsan kasbashada dadka ee kulan hawleedkii Nakuru. Haddana, waa wax adag in laga hadlo midkoodna ka kale la'aantii. Waxa jira, fikrad ahaan, midhadh faraqyo ah oo u dhexeeya labada ra'yi inkasta oo labada yaalaa loo adeegsaday si ay isugu beddelmayaan. Maadaama kasbashada dadka, istaraatejiyad ama xirfad ahaan, ay yeelato micneyaal badan iyo wax la odhan karo dahaadh wareegsan marka la barbar dhigo awood, waxa muhiim ah in la caddeeyo waxa aynu ka hadlayno wax ku saabsan inta aynaan hore halkaa uga dhaqaaqin.

AWOOD IYO KASBASHO DAD

Awoodda waxa yaalaa la raaciyaa xukun, oo ah geeddi-socod la egmaday ama sharciyaysan si loo gaadho wax inay qabsoomaan. Sida uu nin mu'allif ahi uu yidhaahdo, "Xukun wuxu siiyaa qof awoodda uu ku su'aalo hab-dhaqan. Maareeyayaashu waxay u yeelaan si ay dad u hawl-geliyaan. Xukun la'aantii, maareeyayaashu waxay isu qabaan bilaa awood inay yihiin waxaanay dareemaan niyad jabnaan. Dad Kasbasho, dhinaca kale marka laga eego, waxay khusaysaa habka dadban ama aad u yartahay in taaban karo ee loo curiyo fikrado iyo ra'yiyo ama hab-dhaqan. Madaxdu waxa adeegsadaan Dad Kasbasho halkii ay ka adeegsan lahaayeen xukun si ay dadka u geliyaan shaqo qabad. Mid waa khasbid xoog-leh iyo toos; ta kalena waa garansiin iyo si dadban". Xidhiidhka ka dhexeeya xukunka iyo awoodda laga yaabaa inuu noqon karo mid ka mid ah sababaha madaxdii Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan Nakuru ay uga gaabsadeen isticmaalka ereyga awood muddadii ay shirayeen. Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan badan iyo madaxdoodu waa wax yar xukunka ay rasmi ahaan ku leeyihiin wax ka baxsan xuduudda ururkooda. Hase yeeshee, waxay leeyihiin noocyo kale oo awood ah, oo POTENTIAL siiya iyaga fursado aad u xaddi badan oo ay dad kusoo jiitaan. Inta aynaan gelin doodda noocyada awoodda kala duduwani inay yihiin hab kasbashada dadka, sheeko hiddoodka soo socota ka fikir.

Digaagad ayaa indha-beeshay, waxaanay u baratay inay dhulka faadh faadh iyada oo ka baad-hanaysa cunto, inkasta oo indho la'ayd, haddana weli sii waddey inay dhulka faadh faadh iyada oo ku mabsuud ah. Maxay faa'iido ah ee ay u lahayd taasu doqontaa shaqada badan? Digaagad indho fiqan oo lugaheeda jilicsan aan fidin marna ka ag dhaqaaqi jirin ayaa dhinac joogtey oo iyada oo aan taaban ciidda ka guran jirtey midhaha ta kale shaqayso. Mar alliyaale marka ay xab-bad sarreen ah digaagadda indhaha li'i soo faqdoba, saaxiibaddeeda foojigan ayaa liqaysey.

Sheeko hiddood, Gotthold Lessing 1729-1781

NOOCYADA AWOODDA

- **Awoodda abaal-marinta:** Maareeye URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN ama CBO ahaan, waxay siin kartaa abaal-marin shaqaalahaaga ama dadka aad metesho metelan sida dallacaado, dhiirri-gelinno, aqoonsi amaba in aad u siiso adeegga qalab iyo fursado kale.
- **Awoodda cadaadinta:** Isla martabadda hore adigoo haya, waxaad leedahay awood aad ku ciqaabto sida, inaad xanuunjiso, inaad casisho shaqaale, xataa in aad shaqada ka fadhiisiso iyo marka ay tahay dadka aad metesho inaad ka goyso maslaxado ay qabeen ama ka joojiso helidda badeecado iyo adeegyo.
- **Awoodda sharciga ah:** Tani waa mid ku dhisan martabaddaada hoggaamiye urur ahaan ee ku siisa xaqa aad culays ku saarto kuwa kale, ha ahaadaan shaqaale ama dadka aad wakiilka tahay.

Saddexdaa saldhig awoodeed waxay yihiin kuwa aynu badanaa ku tirino inay yihiin awoodda la egmashada oo hal nooc ama mid kale ah. Waxa ay ka dhigan yihiin karaan aad ku jiidan karto hab dhaqanka kuwa kale ka sokow, iska caabbiga kaaga iman kara kuwa saamaynta ay ku yeela-nayaan isticmaalkoodu.

Karaanka Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan inay soo jiitaan kuwa kale uga yeedhaan iyaga usii mara nooca xukun ee ilahoodu awood kasoo jeedaan, waa caddaan inay aad u xaddidan. Xataa, haddii noocyadan awoodeed, sida abaal-marinta, cadaadinta iyo sharciga ay yihiin kuwo la hayo, isticmaalkoodu wax shaki leh buu ahaan karaa, jiritaanka cilaaqaadyada Symbiotic ee Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan la leeyihiin shaqaalaha iyo dadka ay metelaan

Nasiib wanaag, siyaabo kalaa jira oo qof u kordhiyo dad soo jiidashadiisa, isaga oo u maraya awood adeegsiga. Dhamaanba aad bay uga xiisa badan yihiin saddexda aynu immika so sharaxnay. Bal aan isla eegno iyagana.

- **Awoodda Tixraaca:** Kuwani waa calaamadaha shakhsi iyo hay'ad ahaaneed ee qof ku xidhiidhiyo ixtiraamka iyo taabacsanaanta. Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan badidood waxay sahli karaan inay samaystaan saldhig awoodeed noocan ah. waxaanay ka timaaddaa sumcadda madaxdu ku leeyihiin beesha dhexdeeda, iyo kartida hay'adda ee adeeg qabashadu sidu yahay. Si kale marka loo dhigo, Haybadda Tixraaca waa inay tahay mid la kasbaday. Dib ayaynu ugu so noqon doonnaa mar dambe qaar ka mid ah dariiqooyin URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN /CBO yadu u kasban karaan Haybadda Tixraaca. Inta aynaan hore uga socon, waxa muhiim ah inaynu tilmaan in Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan badani Haybad tixraacda ay kasbadaan inay sababtoodu tahay sumcadda wanaagsan ay ka yeesheen beesha dhexdeeda inay yihiin khayraad u qiime leh iyaga iyo weliba shaqada qaybta hawl-galkoodu ku aaddan yahay ee ay metelaan.

Marka ay tahay dhanka awood fiditaan, ilo awoodeedkani waa muhiim. wakaaladaha horumarinta caalamiga ah, sida Baanka Adduunka, hay'adda UN-HABITAT waxa gaar ahaan lagu qiimeeyay lahaansho awooddii URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN /Ururrada Bulshada ku salaysan ay ku keeni lahaayeen hirgelinta waajibaadyadooda. Si kasta ha ahaatee, ujeeddoyinka deeq-bixiyeyaashani, marar qaar, waxay u baahan yihiin in daymada lagu jeediyo. U heellanaantooda raadinta gaashaanbuur inay la galaan Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan waa mid kasoo dhalatay niyad jabyada kaga dhacay gaashaanbuurkoodii soo jireenka ahaa. Maahmaahda gabooshaaga ah ee tidhaa "Loodhkaa bixiya, loodhkaana dib isaga qaata, waa mid ay tahay inaad ku xafiddo khaanadda miiskaaga ugu sarraysa si ay kuugu ahaato xusuusiye in ay waajib tahay awoodda tixraaca in la kasbado oo la kasbado oo la kasbado. Tani weligeed kama bayaansana ta marka uu URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN ama CBO uu aayihiisa mustaqbal ku xidho Ilo maal-gelineed oo caalami ah.

- **Awoodda Khabiirnimada:** Kani wuxu ilo kasbashada dadka ee ugu waaweyn midkood u yahay Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan ku dhisan aqoontaada cilmi, Xirfadahaaga iyo waaya-aragnimadaada. Hadba inta ay sida in noocani tahay il kasbashada dadka loo fahmay badnaan leegtahay looma xoojiyey, ayey weynaan leegtahay dad so jiidashada ay kuu samayn kartaa.
- **Awoodda Xogta:** Kani waa mid kale oo ah il kasbashada dadka muhiim u ah Ururrada aan xukuumiga ahayn /Ururrada Bulshada ku salaysan . Yaalaa waxa aad haysataa xog ama fursadda aad ku heshid xog ku saabsan beesha iyo mid ku saabsan kooxo gaar ah oo beesha dhexdeeda ah kuwaasoo muhiim u ah dadka kale. Xogtu waxay noqon kartaa il awood dad so jiidasho oo muhiim ah oo yaalaa lagu xoojin karo samaysiga xulufaysiga ururro kale oo laga yaabo inay hayaan inyar oo xog aydaan haynin ah oo ugu baahan tihiin inaad meelo

madhan ku buuxsataan. Waa muhiim inaad aqoonsataan ishan awood kasbashada dadka noqon karta ka hor inta aan xogta loo baahanin, dabeedna markaa uu jirto geeddi-socod nidaamsan oo xogta loo ururiyo iyo habaynta macluumaadka iyo xogta.

- **Awoodda isku xidhanka:** Dad soo jiidashadu waxay yaalaa ku saabsan tahay cidda aad taqaanno in ka badan waxa aad taqaanno. Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan waxay yaalaa joogaan marxalad ay doonayaan in lagu xidho ururro iyo shakhsiyaad sumcad kasbashada dadka leh oo muhiim ah. Ma xusuusan tahay dood-deennii ku saabsanayd Kasbashada dadka? Kasbashada dadku ma aha keliya inaad dad u yeelato furnaan, waa sidii aad u yeelan kari lahayd awood aad dad kusoo jiidato.
- **Catalytic Power:** Tani waa hibada sida la isugu darayo laba ama in ka badan oo ah ilaha awoodda kasbashada dadka, ee laga yaabo inaan midkoodna lahayn is-ahaantii haybaddii kasbashada dadka. Waxay u sanqadhaysaa sidii Dhisidda Gaashaanbuuraysiga Istaraatejiga ah, miyaanay ahayn? Gaashaanbuurku waa unugyo muhiim ah oo ka mid ah kartidaada sidaad ugu yeelan lahayd haybad kasbashada dadka heerar kala duwan ee wada macaamilka bulshada. Gaashaanbuuraysiga waxa loo abuuraa sababo fara badan. Korodhsiimo haybad dad jiidasho waa mid ka mid ah.

Waqti yar ku qaado oo dib uga fikir noocyada kala duduwan ee ilaha awoodaha ee aynu hadda loo taxnay ee kordhin kara karaankaaga kasbashada dadka ee beesha dhexdeeda ama beesha ka baxsan.

Midde ilahaasi ka mid ah ayaa, haddii la abaabulo ama la kordhiyo, siyaadin kari lahaa awoodda fiditaanka ururkiinna.

Mid kasta oo aad diiwaan-gelisey, qor hal dariiqo ama ka badan ee aad ku kordhin lahayd ilaha kasbashada dadka.

*Keliya waxa u qalma awood lahaansho,
ka maalin walba ku sifooba
DAG HAMARSKJOLD*

HAB NIDAAMYO LOO MARO KASBASHADA DADKA

Waxay u eg-tahay wax ay caddaysay dooddii haybadda, iyo dariiqooyinka faraha badan ee haybadda shakhsiyeed iyo ta ururreed lagu abaabuli karo siyaabo Dad Kasbasho qiyaas weyn ay uga so qulqusho ilo haybadeedyadaas. Xataa, kartida Kasbasho saamaysa geeddi-socodka dejinta siyaasad guud waxay ku xidhan tahay adeegsiga Ilo haybadeedyada hal ama ka badan oo URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN / CBO ah. Marka ay tahay dhisidda fiditaanka urur, waxa muhiim ah in looga fikir dayo waaxyaha Dad Kasbashada dhinaca Hab-nidaameedyada. Karaanka Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan dad ku kasbadaan waxay ka bilaabantaa hawl-karnimada madaxda iyo shaqaalaha ururradaa, waxaanay degdeg ugu fiddaa hawl-karnimada iyo taariikhdiis hore urur ahaan keli-kelidood, iyo ugu dambayn oo ay gasho xidhiidhadeeda hay'adeed ee ay wadaagaan URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN /Ururrada Bulshada ku salaysan lagu abaabuli karo mawduucyo iyo dano kuseeya beesha ama gobolkaba ku wada baahsan.

HAWL-KARNIMADA IYO DAD KASBASHADA KELINIMO

Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan maxalli ah oo badan karaanka ay dad ku jiitaan toos waxay ugu xidhan tahay qofka/qofafka mudanka ee ururka ku jira. Marka aynu dhisidda buundooyinka u dhex marayno habka qorshayn wadaage ah, waxa aynu dherer xad ah ka doodnaa baahida loo qabo madax wadaage ah iyo iskaashi. Waxa kale oo aynu ugu soo taabannay, baahida loo qabo in la dhiso gaashaanbuur, bilawgii doodan. Wadaagga xilalka iyo mas'uuliyadaha madaxda iyo dhisidda is-bahaysiyada ururreed loo dhex maro noocyo kala duwan oo gaashaanbuur ururreed waxay doonaysaa nooc kale oo dhinaca aragti maarayn ahaan in laga galo iyo hab-nidaameed kale. Buug maaraynta ku saabsan oo dhowaan soo baxay, oo la yidhaa Haybad kor u qaadka, wuxu isku xidhay mabaadi'da Haybadda iyo dad jiidashada labadooda, waxaanay sameeyaan qodobka ah in ay dad jiidashada lamaani abuurto haybad dhamays ah oo dheeraad ah. Maadaama ay mu'allifintu ka hadlayaan wax khuseeya aragti gelitaan ee muraayadda muujisa u ah dhambaallada buugagga taxanahan iyo taxanaha la mataanaha ah ee la yidhaa dhisidda buundooyinka, bal aan daymo ugu yara jeesanno wixii ay yidhaahdaan.

Cinwaan u xuddun ah haybad kor u qaadka wuxu ku abbaaran yahay doorka ay mu'allifintu ku sheegaan Hoggaanka "geesinimo dabadeed". Si uu u fahmo aragtida habka loo maro madaxtinimada, qof wuxu u baahan yahay inuu yaqaan sifooyinka lagu garto Hoggaamiye geesi ah. Hoggaamiyaha geesiga ah:

- Qof kasta oo kaleba wuxu ka ogyahay, wax ka badanbuu ka yaqaan waxa ka socda ururka dhexdiisa.
- Wuxu leeyahay khabiirnimo farsamo oo ka weyn ta mid kastoo shaqaalaha ka hooseeya ka mid ah leeyahay.
- Wuxu leeyahay karti uu dhibaatooyinka ku xallilo oo ka degdeg badan qof kasta oo kaleba. Iyo
- Mas'uuliyadda u mudanbuu iska saaraa wax kastoo ka dhaca ururka dhexdiisa.

Tani dhab ahaan, waa aragti la naaxnaaxiyey ee muunadda madaxtinimo. Hase ahaatee, waxa weliba jira goobaanka hoggaamiyeyaal iyagu naftooda uun sidan uga fikir ilaa maantadan ay jirto aragti maarayneed caalami ahi. Waa nooc hab maarayneed ku dhisan adeegsiga xukun meel dhexe

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

ku urursan in lagu gaadho ururka qasdigiisa. Hoggaamiyeyaasha geesnimada dabadeed, marka la barbar dhigo, waxay ku tiirsan yihiin hoggaan wadaage ah iyo haybad dad jiidasho, “si ay u helaan kuwo kale, ka sarreeya, ka hooseeyaaba in ay si isku mid ah u jawaab celiyaan siyaabaha looga baahan yahay iyadoo aan cidu ku dirqiin.” Waxa intaa raacsan, Hoggaamiyeyaasha geesnimada dabadeed iyo madaxda kale oo ay wada shaqaynta leeyihiin ururka gudhiisa iyo dibaddiisaba waxay ku hawl-galaan dad jiidasho wada jir ah.

Si loo koobo xirfadda babac-dhigga dad-jiidasho wada wadajir ah gebi ahaan, qof waa inuu aqba-laa tibaaxda ah in dad jiidashadu u socoto jiho walba, ee aanay mid kor ilaa hoos ah urur dhexdii ama iman ka ugu awood badan beel weynta hay’adaha ku hawlan abuurka dad jiidasho loo dhan yahay. Xuddunta haybadda dad jiidasho waxa ku jirta ictiqaadka ah inuu qof kordhiyo haybadda dad jiidasho ee kuwa kale waxay kordhisaa isaga haybaddiisa dad jiidasho.

Ururkaaga dad jiidashadiisu waxay ku tiirsanaan doontaa marka u horraysa hawl-karnimada madaxdaada iyo shaqaalahaaga. Unuggan, waxa qayb ahaan lagu soo qaatay wadajir maamulidda iyo horumarinta hantida cududda beni aadmi. Hawl-karnimada madaxda iyo shaqaalaha waxa kale lagu soo qaatay taxanihii dhisidda buundooyin oo ku nuuxnuuxsada doorarka URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN /CBO arrimaha qorshaynta ka qayb-galka loo dhan yahay iyo maa-raynta colaadaha iyo khilaafaadka. Waxaynu u aragnaa labadaa xirfadood inay muhiim u yihiin ilaa heer wax kasta oo ay badanka Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan qabtaan. Waa inay qayb ka ahaadaan Barnaamijka Horumarinta cududda Beni aadmi ee ururkiina iyo inay toos ugu xidhmaan istaraatejiyada ururkiinna ee dhisidda awoodda fiditaanka. Tayada istaraatejiyada awoodda fiditaanka ururkiinna, iyo weliba sidaa awgeed awooddaada dad jiidasho, waxay ka bilaabantaa madaxtinimada iyo kartida shaqaalihiiinu u leeyihiin inay fuliyaan waajibaadkiinna.

HAWL-KARNIMADA IYO DAD KASBASHADA URUREED

Unugga xiga ee kasbashada dadka kartida aad dad jiidasho ku yeelanayso waxay ku jirtaa xoogga ururkiinna iyo awoodda uu ku hawlgeli karo si wax-ku-ool iyo hab-sami ah. Wax-ku-oolnimo micnaheedu waxa weeye in waxyaabo sax ah la qabanayo. Taa micnaheedu waxa weeye in aragti-diinna, hal-qabsiga waajibaadkiinna, yoolalka hawl-galkiinna iyo himiladiinna- oo dhamaantood ah ama inay noqdaan ay tahay, inay xidhan yihiin baahiyaha iyo tabashooyinka egmadeyaashiinna iyo macaamiishiinna. Qalabka looga baahan yahay in lagu hagaajiyo wax-ku-oolnimada sida ururkiinnu u qaban lahaa waxyaabaha saxa ah qaarkood waxa laga heli karaa buugga ka-qaybgalka loo dhan yahay ee taxanaha dhisidda buundooyinka. Weliba si gaar ahaaneed, waxa aad ka heli doontaa afkaar iyo qalab ku tacalluqa geeddi-socodka haloosiga aragtiyeed, qorshaynta istaraate-jiga ah, samaynta yoolal iyo himilooyin macmiil-ku-wajahane ah.

Hab-samidu waa in aad si sax ah wax loo qabto. Taasi waxa weeye ilaa inteebay wanaagsan tahay sida aad u maarayso guud ahaan khayraadka marka loo eego waajibaadkaaga, yoolalkaaga iyo himilooyinkaaga. Kuwaasi waxa weeye khayraadka xoogga beni aadmi, khayraadka maali-yadeed, waqtigaaga iyo Physical Plant, hababka geeddi-gelinta, siyaasadaha daakhili, adeegyada, tabaha iyo istaraatejiyadaha- dhamaan khayraad gacantaada ku jira ee aad u adeegsan kartid fulinta waajibaadkaaga.

Adeegyada ku jira buugagga kale ee taxanahan waxay u naqshadaysan yihiin inay kugu caawiyaan sidii aad wax-ku-oolnimada iyo habsamida ururkiinna usii hagaajin lahaydeen. Haddii aad ka hawl-gashid urur egmadeyaasha xuddun u yihiin, baahidu-dhaqaajiso ama si hufan loo maamulo, sumcad weyn baad ku yeelanaysaan beesha dhexdeeda. Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan maxalliga ah ee muujiya hawl-karnimo shakhsi ahaaneed iyo tu ururnimo oo muddana ku wada inay joogteeyaan waxa laga dhigayaa inay yihiin waax ka mid ah raasamaalka cududda bulsheed ee beesha. Aqoonsiga sidaasoo kale ah waxa weheliya ixtiraam, kalsooni iyo haybad dad kasbasho.

*Dad jiidashadu iskeed uma aha wax xun mana aha wax
wanaagsan, laakiin waxay ku xidhan tahay hadba
sida qof ay usoo maro.*

ANDRE GIDE, PRETEXTS 1903

Istaraatejiyadaha Iyo Dad Kasbashada Ururka Ka Baxsan

Waxaynu hore uga soo sheekaysanay tiro dhawr istaraatejiyado dad jiidasho iyo adeegyo ku jirey taxaneyaashan oo loo naqshadeeyey isticmaalka wixii ka baxsan xuduudaha ururka sida, maaraynta colaadda iyo geeddi-socodyo qorshayn laga wada qayb-galo, xidhiidh-shebekadaynta iyo wax badan oo xirfado war-is-gaadhsiineed ku saabsan. Waxaynu doodan kusoo gebagebeyn doonnaa dad jiidashada innagoo jeedaalo ugu noqonayna Qiimayntii baahiyaha ee Nakuru. Waxa u baahan in la wada maro waa su'aalaha faraha badan ay kasoo jeediyeen geeddi-socodka siyaasadda iyo kaalinta ololaynta.

SIYAASADDO: ARAGTI ILAA RAAD-REEB

Dhugmada duleed, siyaasaduhu waa odhaaho rasmi ah oo ay go'aamiyaan kooxo xukun hayaa si ay u hagaan wax-qabadyada mustaqbalka. Waaqicana, caalamka siyaasadaha iyo siyaasad-dejintu waa wax aad uga murugsan. Qasdiyada doodan awgeed waxaynu u qaadan doonnaa danaha Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan ee ku saabsan geeddi-socodka siyaasadeed waxa lagu xidhiidhiyaa tallaabooyinka ay qaadaan kooxaha xukun dadweyne hayaa ee si toosa saamayn ugu yeesha waajibaadyadooda iyo hawl-galladooda. Marka aynu sidaa qaabno, arrimaha dhisidda awoodda fiditaanka NGOyada iyo Ururrada Bulshada ku salaysan waxay yihiin:

1. Sida loo jiito abuurka iyo ansixinta siyaasado aqoon dheeri ku dhisan inay kasoo baxaan hay'adaha xukunka guud haya ee taageera hay'adaha URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN /CBO iyo waajibaadyadooda. Iyo
2. Sida loo yareeyo ama meesha laga saaro raad-reebka nuqsanta ah ee siyaasadaha hadda jiraa ku leeyihiin Hay'adaha iyo hawl-gallada URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN iyo Ururrada Bulshada ku salaysan .

Ka hor inta aynaan guda-gelin arrinta "sidee loo" kasbanayaa fagaaraha kuwa ansixiya iyo kuwa ansixiya siyaasadaha guud, laga yaabaa inay inag caawiso in laga nadiifiyo qaarkood haramaha kusoo dhex fida saaxadda siyaasadeed.(eeg Tuulka 9aad Qaybta labaad oo si aada kaaga caawin kara saaxadda siyaasadeed).

CUFKA SIYAASADDA

George Sands, oo ahaa magac-beenaad ay la lahayd qoraa gabadh Faransiis ahayd oo caanbaxday bilawgii qarnigii 18aad, waxay ku tidhi warqad ay u diraysey qof ay saaxiibbo ahaayeen: Runtu aad bay u fududahay. Qof waxa had iyo jeer ku khasab ah inuu halkaa ku gaadho safar jid adag. Waxa dhici karta inay taasi ahayd difaaceedii ugu wanaagsanaa markii ay ka hor yimaaddeen dacaayado lagu sheegay inay tahay qof ku dedaalaysa inay noqoto qof aanay iyadu ahayn. Siyaasaduhuna waxay leeyihiin magac-beenaadyo badan fara badan oo loo maro jidad badan oo adadag. Ereyga siyaasad, waxa loo isticmaalaa fasiraadda hawlo kala duduwan oo kala fog. Metel ahaan, ereyga siyaasad, waxa dhici karta qofka isticmaalaya inu maskaxda ku hayo inu yahay:

- Qorsheyaasha Istaraatejiga ah iyo jihataynta mustaqbalka
- Tafsiirka wax-qabadyada waqtiga xaadirka ah; ee ah siyaasaddeenna
- Dariiqo loo shaaciyo go'aan dadweyne ha noqoto ama yay noqon mawqif rasmi ahaan ay u go'aansadeen kooxda xunkunka haysaa.
- Mawqif ay gorgortan ka wada galeen dhinacyo laba ama ka badan ahi
- War-murtiyeed ujeeddo laga leeyahay; ama
- Xaqiiqo la taaban karo oo waaqici ahayd oo aan loo qasdiyin, lana iclaaminin oo aan weli-geed cidinaba go'aan ku qaadan, xataa kuwa loo haysto inay leeyihiin kaaalinta "siyaasad dejineed".

Inkastoo ay tahay sahankan loo galay caynta hadallada siyaasadeed inay u ekaato wax aan ahmiyad buuran lahayn, waxa muhim ah in la fahmo in siyaasaduhu jiraan iyo in laga helo karo meelaha ugu la yaabatiinka badan. Haddii URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN /CBOgiinnu uu doonayo inuu ku helo dad kasbasha siyaasado cusub uu qaato ama kuwii hore oo uu beddelo ama laga guuro, markaa waxa u baahan tihiin inaad weliba ku taqaanaan magacyo-beenaadkooda ay leeyihiin. Iyada oo ay badanka siyaasadaha guud ay yihiin natiijo kasoo dhalatay geeddi-socod loo qasdiye ayna ku go'aan qaadatay hay'ad siyaasad dejineed oo la doortay oo ku salaysan falanqayn iyo doodo nidaamsan, haddana siyaasaduhu siyaabo kalena way dhacdaa inay u samaysmaan, haddii la doono. Waxa soo socda qaar ka mida dariiqooyin aan caadiga ahayn ee siyaasadaha loo dejiyo:

- **Hab gorgortan:** Metel ahaan, dawladda hoose waxay la gorgortan kula jirtaa deeq-bixiye weyn oo caalami ah si ay uga hesho lacago ay ku dhiso warshad nadaafad biyood. Deeq-bixiyuhu wuxu ku adkaysanayaa in la oofiyo shuruudo cayiman ka hor inta aan lacagaha loo sii deynin, oo micnaheedu yahay ma jirto lacagi ilaa dawladda hoose aqbasha inay buuxinayso shuruudo cayiman. Shuruudahani lasoo qaddimay waxa laga yaabaa inay cawaaqibyo halis ah ku leeyihiin Ururrada aan xukuumiga ahayn ama Ururrada Bulshada ku salaysan iyo egmadeyaashooda.
- **Siyaasado lagu dhex dejiyo shirarka miisaaniyado sannadeed:** Golaha magaalada ayaa ka jaray maal-gelinta barnaamij cusub oo siinaya carruurta jidadka fursado nooc tacliin kaab ah. Wixii dhowaan loo arkayey guul siyaasadeed ugasoo hoyatey Ururrada Bulshada ku salaysan ay khusaysey shirkii hore ee golaha, waxa gawracay baahi loo qabey in lacago loo kaydiyo kuwo kale oo muhimmadoodu ka mudnaansho weyn tahay.
- **Siyaasado Maamul lagu dejiyo:** Qaybta Bileyska ayaa go'aansatay inay xayirto barnaamijkii roondada xaafadaha degaanka, inkasta oo golaha magaaladu soo saaray siyaasad ku wajahan samaynta xeerar dhaqmaad oo nabad-geliyo oo sharciyaysay Barnaamijka roondada. Mar haddii aanay goluhu sidaa isugu taxallujinin dabagelidda dhaqan-gelinta

siyaasadoodii fidinta nabad-gelyo sugan oo heer xaafadeed ah, iyo maadaama ay aad u yaraayeen cabashooyinka rasmi ahaa ka yimid, qaybta bileysku iyadaa dejisatey siyaasado iyagu samaysteen oo roondada xaafadaha ku wajahan

- **Siyaasado ka dhasha wax-qabad shaqsi:** Halkii ay ka ahayd siyaasadda Golaha magaaladu inay ku jiraan URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN iyo Ururrada Bulshada ku salaysan liiska qandaraasleyda soo doonata iibka badeecadaha iyo adeegyada wakiilkii iibku yaalaa wuu iska indho tiraa siyaasadda u dhigan.

Sida aad arki karto, siyaasad dejinta iyo siyaasad fulintu waa geeddi-socodyo yaalaa waaqicyo ka duwan kuwii aynu fili lahayn, oo bixiya muuqaallo la qurxiyey oo ku salaysan siyaasad dejintu inay tahay mas'uuliyadda saraakiisha la doorto. Marar badan siyaasadaha guud waa bayaanno ay ujeedo ka leeyihiin kuwa dejiya siyaasaddu oo aan weligood dhicin in ficil loo tarjumo. Munaasabado kalena siyaasaduhu waa bayaanno run ah oo ku dhisan ficilooyin aan marnaba idmin siyaasad dejiyeyaasha rasmiga ah. Si aan doodda usii adkayno siyaasadaha waxa lagu dejiyaa DEFAULT. Maareeyeyaasha iyo hay'adaha adeegga guud iyo waxay yaalaa dejiyaan siyaasado ama iyaga oo is-diidsiinaya siyaasadaha kasoo baxay doodaha iyo go'aan qaadasho kuwii loo doortay ama inay sameeyaan xeerar ay iyagu leeyihiin oo iska noqda siyaasad guud muddo ka dib.

MAXAA LA YEELAA?

Iyada oo lagu salaynayo sawirka candadawlan ee socod taxanaha siyaasad dejin ilaa hirgelinteeda iyo munaasabad kale kala xidhiidh-furadkooda, waa maxay waxay Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan ku qaban karaan adeegsiga haybadda dad kasbasho si u dejiyaan siyaasado iyo hirgelintooda? Waxay run ahaan ku xidhan tahay waxa aad rabtid inaad samaysid. Haddii aad rabtid siyaasad cusub in curiyo iyo in la hirgeliyo, markaa wax-qabadyo cayiman ayaa in loo baahdo dhici karta. Haddii aad rabtid inaad hirgelisaan siyaasad ay dejiyeen gole degaan, laakiin aanad weligaa u shaqaynin si waafaqsan ujeeddooyinkii waxa laga yaabaa inay kaaga baahan karto hawlo noocyo kale ah. Haddaan rabtid hirgelinta siyaasadaha xaadirka socota in la beddelo ama ujeeddadii wax ka beddelka siyaasadda, way dhici kartaa inay istaraatejiyad kale kaaga baahato.

Maadaama fursadda nufuud loogu yeelanayo saaxadda siyaasadda guud ay waddan midka kale ka duwan tahay, waa wax adag in lagu taliyo wax qabadyo guud oo wax-ku-ool ah iyo kuwo ku wada munaasib ah dhan walba. Iyadoo lagu salaynayo malahaas, waxan halkan kuugu hayaa tilmaamo wada anfacaya xaaladaha badidooda.

- **Faham geeddi-socodka siyaasadda beeshiina dhexdeeda:** Sidee baa caado ahaan siyaasadaha loogu qaddimaa geeddi socodka siyaasadeed? Yaa uga mas'uul ah Hay'adda siyaasad dejinta inuu cilmi-baadhis ugu sameeyo inta aanay siyaasadaha cusub ansixinin ka hor? Geeddi-socodyo kulan-dood iyo ogeysiino dadweyne oo noocaa ahbay ayaa loo baahan yahay inay maraan si loo xaqiijiyo siyaasadaha lasoo jeediyey inay hawada ka baahaan? Waa kuma qofka ama xafiiska ugu fiican ee lagala xidhiidhi karo xogta arrimaha ku tacalluqa siyaasadda? Kumaa mas'uul ka ahaan doona qoraalka asaasiga ah ee tilmaama hirgelinta iyo ficliyan ka maarayn doonaa geeddi-socodka lagu hir-gelin doono? Sidee hay'adda siyaasaddu u daba-gashaa hirgelinta siyaasadda waqtiga xaadirka ah; iyo maxay tani odhan lahayd ee ku saabsan daba-galka hawlaha sharci-dejineed ee mustaqbalka? Su'aalahan iyo kuwa badan oo kaleba waxay u baahan yihiin in lagaga jawaabo hab ku saabsan sida geeddi-socodka siyaasadda uga shaqeeyo beeshiinna gudaheeda, haddii aad

doonayso inaad nufuud ku yeelato guddoonnada siyaasadda.

- **Gaashaanbuur la gal ururro isku aragtida tihiiin:** Waxaad aqoonsanaataa in karaanka siyaasadda dad kasbashada iyo geeddi-socodka siyaasada aad waxa kor ugu qaada iyadoo qaar kale isku xidhantaan geeddi-socodka dhexdiisa. Ha u qaadan in ururkiinna iyo dadka meteshaan yihiin kuwa keliya ee danaynaya dejinta mawduucyo siyaasadeed qaarkood. Ka fikir sanduuqa dibaddiisa meelo ah oo taageero iyo dad kasbasho dheeraad ah kaaga iman karaan, oo ay ku jiraan ururrada iyo shakhsiyaadka ka kala socda qaybaha kala duwan ee beesha. Metel ahaan, shirkad weyn wacyiga bulsho sarreeyo ayaa dhici karta inay dan weyn u leedahay taageeridda dejinta sharci cusub oo degaanka ku saabsan, inkastoo laga yaabo inay xataa maal-gelin dheeraad ah ku samayn karaan mashruucu inuu ahaado mid waafaqa xeerar cusub.(Fiiri cutubka ugu dambeeya ee Tilmaamaha loo cuskado Dhisidda Gaashaanbuur Istaraatejiga ah).
- **Firfircooni ku taageer Siyaasado guud idinka iyo Egmadeyaashiina muhiimka idiin ah.** Miyaad leedihiin qof ama guddi haya diiwaanka qoran ee masalooyinka siyaasadeed ee ururkooda khuseeya? Haddii aanu jirin, ka fikir sidii aad mas’uuliyadda cid ugu xilsaari lahaydeen. Waa hab wanaagsan in loo adeegsado mutadawiciin, gaar ahaan kuwa yaqaanna geeddi-socodka siyaasadda iyo weliba yaqaanna cidda lagala xidhiidho masalooyin cay-iman. Ha sugin ilaa ay gaadhayso siyaasadda in la guddoomiyo adiga oo aan ka qayb-gelin. Yaalaa tani waxay ku ahaanaysaa dibu-u-dhac sidii aad nufuud ugu yeelan lahayd. Sii ogaada baahiyihiinna siyaasadda cilmi baadhidda loo baahan yahayna sii qabta si aad u kari karto inaad dacwad cuntanta u ban-dhigto dad ku habboon. Xidhiidh la samee wakaaladaha ka faa’iidaysan doona siyaasadda aad u doodayso oo kasbo taageeradooda. Adeegso xidhiidhka shebekadeed ee aad lahayd si aad u aragto waxa gobollada iyo waddamada kalena ka qabanayaan masalada iyo masaalixda kuwan aad waddaan la mid ah.
- **U tabaabolshayso uga jawaab baahiyaha siyaasad-dejiyeyaasha daqiiqo kastoo ku habboon iyo inta karaankiinnu yahay.** Hay’adaha siyaasaddu guud waxa kale oo ay gargaar u baahan yihiin marka ay ka fiirsanayaan dejin sharci cusub ama soo food-saarto hir-gelinta siyaasadihii hore u jirey. Adiga iyo ururkaaga dhici karta inaad ugu adeegtaan guddi ka bixiya talo khabiirnimo shuruuduhu ku ansaxayo hir-gelinta sharci aan weli la asixinnin ama aad ku dhex fidisaan egmadeyaashiinna araji aad taageero heer-beeleed ugu doonaysaan isbeddelo siyaasadeed. Haddii aydaan sidaa hore usii samaysan, ka war-geliya kuwa mas’uulka ka ah hoggaaminta geeddi-socodka siyaasadeed rabitaankiinna iyo diyaarsanaantiinna inaad ka qayb-gashaan.
- **Ha joojin ku lug-lahaanta ka dib guddoominta siyaasado cusub:** Caadiyan, tilmaamaha maamulka waxa la dejiyaa ka dib marka ay siyaasad-dejiyeyaashu dhamaystaan shaqadooda sharciyeed ee ah qaadashada guddoonno siyaasadeed. Sida siyaasad cusub loo hir-geliyaa waa la mid muhimaddii isla siyaasaddaasi curinteeda iyo abuurkeedu lahaayeen. Haddii ay suur-gasho, ku dhaqaaq gacan-siinta curinta qoraalka tilmaamaha haddii siyaasaddaasu u socoto saamayn inay ku yeelato hawl-galladiinna ama egmadeyaashiinna.
- **Daba-gal, hadday suurtoowdo, hir-gelinta siyaasadaha toos u saameeya ururkiinna iyo egmadeyaashiinna:** Miyaa siyaasadaha la hir-gelinayaa? Hadday aanay ahayn, maxaa wacay? Hir-gelintii miyay u socotaa hab xaq-soor iyo sinnaan ku dhisan? Maxay yihiin

raad-reebka bulsho, dhaqaale iyo deegaaneed ee siyaasadaha hadda jiraa ay ku leeyihiin beesha?

Dhex-gelidda geeddi-socodka siyaasad dejintu wuxu u noqon karaa mid la qabatimo, gaar ahaan kuwa iyagu dibadda ka jooga mas'uuliyadaha rasmiga ahee siyaasad dejinta beesha. Haddii aad maarayso, agaasinto ama metesho URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN ama CBO yar laga yaabaa inaad u haysan waqti aad kaga qayb gasho geeddi-socod kaa mashquuliya waajibaadkaaga asaasiga ah ama shaqooyinkaaga waqti dheer. Marka ay jiraan caqabadaha waqti, dagaalladaada siyaasadeed si taxaddiran u xulo, culayskooduna yaanu kelidaa ku fuulin.

OLOLAYNTA

*Alaabtaada oo dhan ma wada sudhi
kartid musbaar qudha.
MAAHMAAH RUUSH AH*

Ololayntu waa hawlaha loola jeedo kasbashada saraakiisha dejisa siyaasadda guud iy weliba si gaar ahaaneed, kuwa xubno ka ah hay'ad sharci-dejineed si loo gardaadiyo ama loo xaqiijiyo ansixinta sharciyeed sida, siyaasado. Iyadoo badanka wixii immika lasoo yidhi ee ku saabsanaa jiidashada geeddi-socodka siyaasaddu ay ku dabbaqmayaan ololaynta, waxa haddana la yaab ah in la jideeyo dood ka geddisan in laga galo. (Waxa kale oo aad ka heli kaalmo ku saabsan kordhinta xirfadahaaga ololaynta baadhashada Tuulka 10aad ee Qormada Labaad).

Ololayntu heerka maxalliga ah yaalaa waa geeddi-socod aad uga duwan heerarka goboleed iyo heerarka qaran ee xukuumadeed. Wixii aynu hadda kasoo sheegnay jiidashada siyaasad dejinta waa wax inay ku dabbaqmaan u badan heer maxalliga ah halkaasoo geeddi-socodku u badan yahay heer shakhsi, dadka la kasbanayaana badanaa yihiin in si fudud loo helo iyo iyada oo tirada shuruucda loosoo jeediyo in laga baaraan-degaa u yihiin wax la maarayn karo. Nufuud ku yeelashada kiilladaada dawladda hoose waa wax fudud marka la barbar dhigo waxa ay kugu qaadata inaad dhex gasho ololaha geeddi-socodka siyaasad-dejinta ee heerarka sare ee xukuumadda.

Waxa jirta dawladdaha yaryar ee Maraykanka midkood in ka badan 5,000 oo qurub oo ah shuruuc la soo jeediyo ayaa la soo hor-dhigaa bilawga shir kasta oo sharci-dejineed iyo 2,500 kale oo lasoo qaddimo inta ay doodaha sharci-dejiye-yaashu socdaan. Marka lagu xisaabtamo culayska ay leeydahay ka baaraan-degga tirada xaddigaa leeg ee shuruuc qabyo ah, u babac-dhigga iyo xilka dad kasbasha geeddi-socodka sharciyeed waxay qaadaysaa booddo xaddi weyn. Hawl-galka Gaashaanbuuraysiga iyo xidhiidho-shebekadeedyadu ee ka ololayn gelaya heerka sare ee xukuumadda waa wax aan suurtoobin haddii aanad metelin URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN muctamar ah oo maxalli ah ama hay'ad weyn oo caalami ah.

Haddii metelan idinka iyo saaxiibbadiin go'aansataan inaad ku biirtaan dallad Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan ah si aad u gashaan hawlo ololayn xoogleh oo rasmi ah, halkan waxa kuu yaalla midhadh fikrado aho ku saabsan geeddi-socodka.

- Tiro waddanno ah Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan way ka xidhan yihiin inay ka qayb-galaan siyaasadda xag raaca ah. Ma awoodaan inay oggolaadaan murashaxiin siyaasadeed umana abaabuli karaan egmadeyaashooda taageerid ama diidmo murashaxiin. Xataa mana karaan inay ugu biiriyaan qaadhaan lacageed murashaxiin siyaasadeed.
- Marka Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan ololaynayaan, waxay ka hadlaan masalooyin. Waxay ku kalsoonyihiin xurmada qaddiyadaha ay u taagan yihiin halka ay geli lahaayeen xodxodasho siyaasadeed. Mawaaqiftooda waa inay xurmayn mudnaadaan.
- Nufuud ku yeelashada go'aannada guud ee u adeega danaha muwaadinka fardiga ah ee aan fursadda u haysan ka qayb-galka geeddi-socodka siyaasadda ama aan lahayn khibrad-dii ay ku ilaashan lahaayeen masaalixdooda ayaa sababaha ugu luxdan ee Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan loo abuurto. Ololayntu hal dariiqo oo muhiim u ah sidii looga jawaab celin lahaa mas'uuliyadda asaasiga ah.
- Ololaynta wax-ku-oolka ah waxa badhi-taara falanqaynta baahiyaha, soo jeedino is-ladha, natiijooyinka laga fili karo soo jeedinaha is-ladha ee siyaasadda iyo cawaaqibka madhnaan siyaasadeed marka lagu xidhiidhiyo siyaasadaha markaa laga baaraan-degayo.
- Si aad u noqotid ololeeye wax-ku-ool ah, idinka, shaqaalihiiinna iyo xubnaha egmadeyaashiinnu waxaad u baahan tihiin inaad ogaataan sida xukuumaddu u shaqayso. Weliba si gaar ah, waxaad u baahan tihiin inaad ogaataan sida ay hay'aadka sharci-dejintu ay siyaasadaha iyo qawaaniinta uga curiyaan macluumaadka, afkaarta iyo aaraa'da ceydhiin iyo ficilooyinka docogaysiga ee ay ugu rogaan siyaasado iyo barnaamijyo ama u adeega danihiinna ama aan anficin.
- Geeddi-socodka sharci-dejintu waxay noqon kartaa wax fajiciso ku ah cid walba marka laga reebo kuwa iyagu toos ugu hawllan. Waxay kaloo noqon kartaa wax dalba dalka kale kaga duwanaado, markaa ha isku hallaynin sida loo sameeyo inaad uga tilmaan qaadato geeddi-socodka buuggaag meelo kale loo dejiyey.
- Ha ku bixinnin waqti badan inay naftaadu isku hambalyayso inaad tahay ololeeye buure ah marka aad ogaato in soo jeedinahaagi sharci noqdeen. Si degdeg ugu xisaabtan sidii aydin siyaasadaha iyo qawaaniinta cusub uga samayn lahaydeen faa'iidooyin la taaban karo inay u yeeshaan egmadeyaashiina.
- Ha ka walaacin adeegsiga mutadawiciin si ay kaaga caawiyaan u ololaynta qaddiyaddaada. Iyagaa had yaalaa awood wax fahamsiin badan.
- Ololaynta Wax-ku-oolka ah waxa ku jira hawlaha ay ka midka yihiin:
 - o U habee egmadeyaashaada inay wax ugasoo qoraan wakiilladooda wax ku saabsan masalooyinka iyagu aad u muhiimka ah.
 - o Kulanno laga yeesho sharci-dejiyeyaasha iyo xubnaha shaqaalahooda
 - o Abaabulka dhamaan xidhiidho-shebekadeedka aad leedahay adigoo u diraya telefoon iyo e-mail si ay iyagu xidhiidh ula sameeyaan wakiillada xeer-dejinta ka hor inta aanay codkooda dhiiban.
 - o Inaad joogto marka ay codka bixinayaan iyo inaad hubiso inay ogyihiin in aad joogtaan idinka iyo wakiilladiinnu inaad xaadir tihiin.
 - o Inaad xaqiijisid inay kaa helaan waad mahadsan tihiin qoran oo xusuusiya inaad danaynayso aadna u diyaar noqonaysaan inaad heshaan taageeradooda marka dambe ee la isu yimaaddo.
 - o Inaad joogtayso hal adayggiinna iyo habsamidiinna dedaalka aad ugu jirto sidii shuruucda la dejinayaa u waafaqaan maslaxadihiinna.

- Waxa tababar ka siisaa habka xirfadda Ololaynta kuwa si toos ah ugu hawlan. Waa inay ku jiraan waxyaabo qoran oo ay u baahan doonaan si ay u noqdaan wax-tar sida nuqul-lada shuruucda la soo jeediyey, liisaska ay qoran yihiin magacyada sharci-dejiyeyaasha iyo kuwa kale ee ay tahay in lala xidhiidho oo ay geliyaan lambarrada telefoonnada iyo macluumaadyo kale oo muhim ah, iyo sawirka sida qurub sharciyeed oo qabyo ahi uga samaysanayo dariiq uu kaga geyoon lahaa jafjafka.
- Waxa kale oo aad ku siisaa tababar xirfadeed sida loo diro telefoonnada, sida loo diyaariyo shirarka iyo habka loo qoro waraaqaha codsi oo ah sax, kooban, bayaan iyo waqtiga ku habboon.
- Haddii aad shaqaynayso adigoo qayb ka ah is-bahaysi URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN /Ururrada Bulshada ku salaysan , oo ay arrimahoodu xasaasi yihiin marka laga ololaynaayo heer qaran
- Waa inaad abuurto is-aamminaad iyo ilaalinteeda
- Ku dhaqan furnaan iyo daacadnimo war-isgaadhsiineed
- Ku heshiia in hal urur idiin noqda wakiil idin metela dhamaan
- Si isleeg wax ugu wada sheeg xubnaha.
- Wada gaadhsii natiijada dedaalkooda si ay diyaar ugu noqdaan marka xiga ee sidan oo kale la isugu yimaaddo
- Dabbaal-deg oo aad u samaysaan guusha iyo inaad diyaar u noqoto shirka xiga ee xeer dejintu inuu qabsoomo.

Judith Meredith, oo buug ka qoray ku saabsan sida loogu ololeeyo xadhig-kabeed, wuxu leeyahay, waxa jira laba xeer oo qudha kuwaasoo ka noqda seeska dedaalka ololaynta ee shebekadda xidhiidhisa muwaadiniinta.

Xeerka 1: Saraakiisha la doorto iyo kuwa la magacaabo waxay qaataan go'aanno kala duwan marka ay arkayaan egmadeyaashooda ay khuseeyaan.

Xeerka 2: Ololaynta waxa micnaheedu waa gaadhsiinta xogta saxa ah dadka habboon waqtiga ugu habboon.

***Dadka jecel qaanuunka ama maraq wanaagsan
waa inaanay daawanin midkoodna marka la
samaynayo
BISMARCK.***

TOBAN SABABOOD OO LOOGU OLOLEEYO QADDIYADDAADA

Waaxda madaxa bannaani waa kulanka hoggaamin qaran ee Maraykanka oo ka shaqeeya dhiirrigelinta dedaallada URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN iyo Ururrada Bulshada ku salaysan , mutadawaciinta iyo wax-qabadka muwaadinka. Daabacaadaheeda ay soo saarto waxa ka mid ah qoraal xaashi qudha ah oo cinwaankiisu yahay Toban sababood oo ah inaad ugu ololaysaan qaddiyaddiinna oo ka dhiga toban sababood oo ku wanaagsan inuu idinka idinla wadaago.

01. Isbeddelbaad samayn kartaa
02. Dad wada shaqeeyaa isbedelbay samayn karaan
03. Dadku way beddeli karaan qawaaniinta

04. Ololayntu waa dhaqan dimuqraadiyadeed
05. Ololayntaa caawisa sida xal dhab ah loo heli lahaa
06. Ololayntu waa wax fudud
07. Siyaasad dejiyaa way u baahan yihiin khibradaada
08. Ololaynta dadka ayey kaalmaysaa
09. Fikradaha Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan waa muhiim
10. Ololayntaa qadiyadaada fidisa iyo kalsooni shacbi oo dhisanta

Ololayntu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah dhisidda awoodda fiditaanka urur. Ololayntu waxay kale oo u tahay tiir muhiim ah oo looga baahan yahay geeddi- socodka dimuqraadiyadda, laakiin iyadu ma shaqayn karto haddii kuwa idiin dejiya sharcigu aanay ogeyn waxa ay Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan uga baahan yihiin iyaga. Waxa loo doortay inay idin metelaan, ee aanay maskaxdiinna ka akhriyin. Ololayntu waa kasbashada dadka oo shaqaynaysa. Kasbashada dadka...

Fikrado badan baa si fiican u kora marka lagu tallaalo maskaxo kale oo aan ahayn kuwii ay kasoo curteen.
OLIVER WINDELL HOLMES

Marka aynu keenno doodda kasbashada dad heer gebagebo, waxaynu ogaanaynaa inay tahay mawduuc faracyo badan. Waxaynu kasoo hadalnay wax ku saabsan haybadda iyo noocyada kala duduwan ee ilaha haybad yeelashada ee URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN iyo Ururrada Bulshada ku salaysan iyo madaxdoodaba u furan si ay u siyaadiyaan kasbashada dad ee ay ku yeelanayaan beesha dhexdeeda. Yaalaa, Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan , weliba gaar ahaan kuwa yaryari, waxay isu maleeyaan inay bilaa haybad yihiin. Waxaan rajaynayaa, doodda haybaddu inay siin doonto aragti qoto dheer iyo damaanad qaad kuwa isu haysta bilaa awood beelahooda dhexdooda.

Waxaynu isla soo eegnay siyaabo aynu u siyaadin karno awooddeenna kasbashada dadka heerarka kala duwan ee wada macaamilka. Kasbashada dadku waxay ku dhisan tahay urur keliya gudihii iyo istaraatejiyadihiisa iyo kartiyihiisa ururka ka baxsan. Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysani waxay wax-ku-oolnimo weyn yihiin marka ay khayraadyadooda kasbashada dadka ka abaabulaan dhamaan saddexda heer ee hawl-gelidda.

Waxa lagu rajo weyn yahay, in dalladda siyaasadeed ay yara fududahay si loo fahmo natiijada dooddeenna awgeed. Inkastoo ay rasmi ahaan tallaabo sharci-dejineed tahay, waxa muhiim ah in la xusuusnaado in siyaasadaha loo dejiyo suuqyada dariiqooyin kale oo rasminimadu ku yar tahay. Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan waxa looga baahan yahay feejignaan si ay u xaqiijiyaan in dadka ay u adeegaan iyo egmedeyaashoodaba aanay waxyeel-laynin tallaabooyinka siyaasad dejinta ee hadoolilan geeddi-socodka rasmiga ah. Gebagebadii, waxaynu ka bixinay dhawr tibaaxood sida looga dhex ololeeyo xeer-dejintaada. Dariiqadan loo maro kasbashada dadka waa mid noqon doonta inay wax dal iyo dhaqan ku khaas ah u badnaato, markasoo midkiin kastaa u baahan doono inuu qabsado shaqadiinna guri si uu u xaqiijisaan in baahiyihii iyo rabitaannadii Golihiiinna xeer-dejinta si qumman loo fahmayo loona metelaayo.

Geba-gebadii, waxaan doonaynaa inaanu idin xusuusinno sida ay muhiim u tahay iyo sida ay ugu xidhxidhan tahay labada kale ee istaraatejyadaha fiditaanka urur, war-is-gaadhsiinta iyo dhisidda gaashaanbuur istaraateji ah, inay ku dhex jiraan dedaal kastoo kasbasho dadka oo aad ku dhaqaaqdo. Istaraatejyad fiditaan urur oo wax-ku-ool ah waxa ku jiri doona dhamaan saddexda waaxood ee qalabyada loo adeegsado. Sida unugyada keegga oo kale, waxay ugu fiican yihiin marka isticmaalka saddexda la isku daro.

Qodobbo Muhiim Ah

- Kasbashada dadku waa istaraatejyada iyo xirfadda saddexaad ee raad-reebka dhisidda awoodda fiditaanka Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan waxaanay sida u fiican u shaqaysaa labada kale lagu badhxo.
- Xuddunta kasbashada dadka waa haybad, haybadduna waxay ka timaaddaa noocyo badan oo kala duwan, ma aha uun adeegsiga haybad ceydhiin si loo jilciyo mucaaradad.
- Ilaha haybadeed ee aad ugu muhiim ah Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan waa kuwa tixraaca, khabiirnimada, xogta, xidhiidhka iyo ta galaangalka.
- Uga fikir dad kasbashadaadu inay ku dhex samaysan tahay nidaam waaxyihiisu isku wada tidcan yihiin. Waxa ku jira hawl-karnimadaada fardi ahaaneed, kuwa ururkiinna, shaqaalaha iyo egmadeyaashiisa; iyo ta gaashaanbuuraysiga aad ka samaysateen ka shishe xuduudaha URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN iyo Ururrada Bulshada ku salaysan (CBO)giinna.
- Kasbashada dadku URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN iyo Ururrada Bulshada ku salaysan waxay aakhiritaanka ugu jiri doonta hawl-gelinta siyaasad dejiyeyaasha abuura sayn-saabka sharciyeed ee taageera ama carqaladeeya dedaalladiinna.
- Siyaasadaha Guud waa xilalka saraakiisha la doorto, laakiin waxa ilkaha u tuma kuwa loo xil-saaro maamulkooda inay ka shaqeeyaan.
- Hawlo badan ayaa wareega iyagoo u maldahan inay yihiin siyaasado, dad badan oo aan siyaasad dejiyeyaal ahaynina waxay dejiyaan siyaasadda guud.
- Si aad ugu guulaysato inaad haybad dad kasbasho ku yeelato saaxadda siyaasadeed, faham geeddi-socodka, samayso gaashaanbuur ah hay'ado aragtida iskaga mid tihiin, firfircoon-aanta u janjeedh iyo lahaansho tabaabushe in aad ka qayb-gasho.
- Ololayntu waa mid qalabyadaada kasbashada dadka kuwa ugu wanaagsan ka mid ah, waxaanay u baahan doontaa xirfadahaaga shebekad xidhiidhinta iyo dhisidda gaashaanbuur.

TIXRAAC (NOTES)

- 1. Hickman Craig. Maskaxda Maareeyaha, nafta hoggaamiyaha. New York: John Wiley and Sons, 1992. P. 99**
- 2. Bradford, Davis and Allan Cohen. Power Up: Dhalan-rogidda Urur loo dhex maro hoggaan wadaag, New York: John Wiley and Sons. 1998. P. xvi.**
- 3. Ibid. Isla qoraalka. P. 184**
- 4. Qaar badan oo ka mida waxa laga xaqiijiyey xigmada iyo aragtidheer ee Judith Meredith, sidaas daraadeed mahadsanid meelkasta oo aad lagayaabo inaad ku sugantahay.**
- 5. Meredith, Judith. Lobbying on a Shoestring. Boston: Massachusetts Continuing Legal Education, 1989.Pp.2-4**

GLOSSARY	
ENGLISH	SOMALI
1. Accountability	- Xisaabtan - Xilkaa Saaran yahay
2. Action plan	- Qorshe hawleed - Wax-qabad hawleed
3. Active Listening	- Dhegaysi feejigan - Dhegaysi Darban - Dhegaysi Mug leh
4. Alternative	- Kala Doorasho - Wax bedeli kara wax kale
5. Application	- Arji - Codsii - Adeegsi
6. Assessment	- Qiyaasid - Qiimayn
7. Authority	- Suldada - Awood xukun
8. Awareness	- Wacyi-galin - Ka war qab
9. Basic Education	- Wax-barasho Asaasi ah.
10. Beneficiary	- Dan ku Qabe - Ka faa'iidayste
11. Capacity Building	- Kobcin wax Qabad - Awood dhisid
12. Case Study	- Daraasad Xaaladeed
13. Check list	- Liis Hubineed
14. Civic	- Madani - La xiriira magaalo - Muwaadin
15. Collaboration	- Gacan siin - Wada shaqayn - Is Caawimid
16. Committee	- Guddi
17. Communicator	- Gaarsiye - Isgaadhsiiye
18. Community	- Beel - Jaaliyad
19. Community Development	- Horumarin Beeleed - Horumarin Jaaliyadeed
20. Concepts	- Figrado - Aragtiyo
21. Conceptual Hat Rack	- Figrada Metalaada Xilaalka
22. Conflict	- Is-qabad/Khilaaf - Iska hor imaad

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO
KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

23. Consensus	- Rayi la isku raacay - Aqbalaad figrad guud
24. Consequently	- Natiijo - Cawaaqib
25. Constituency	- Dagaan Doorasho
26. Co-operation	- Iskaashi - Wada shaqayn
27. Council	- Gole
28. Councillor	- Xil-dhibaan Degaan - Xubin ka tirsan Gudiga degaanka
29. Counter productive	- Maax Dumin - Lid ku ah
30. Criteria	- Cabirka wax lagu saleeyo - Qoddobbo wax lagu saleeyo
31. Critique	- Wax lagu Saleeyo
32. Decision Maker	- Goa'aamiye
33. Definition	- Qeexid
34. Delegation/Delegate	- Wefti - Ergo
35. Democracy	- Demoqraadiyad
36. Description	- Tilmaan - Sifo - Sharax
37. Dialogue	- Wada Hadal
38. Effective	- Wax ku ool - Sidii la rabay wax u tarid
39. Effective leadership	- Hogaaminta wax ku oolka ah
40. Efficiency	- Wax qabad fiican leh
41. Elected Leadership	- Hogaaminta la doortay
42. Empower/Empowerment	- Awood siin - Awood u fasaxid
43. Enabler/Enable	- Awood siin - Karti siin
44. Essay	- Qormo - Maqaal
45. Ethical	- Hab-dhaqan
46. Evaluation/Evaluate	- Qiimayn
47. Evaluation Survey	- Qiimayn Sahan - Baaritaan qiimayneed
48. Exercise	- Layli
49. Facilitator	- Fududeeye/Sahle
50. Feed back	- War Celin - Jawaab Celin
51. Financier	- Masuul Maaliyadeed.
52. Gender	- Jandar

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO
KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

53. Goal	- Hadaf - Gool
54. Good Governance	- Hab Xukun Wanaagsan - Hab Maamul
55. Government	- Xukuumad
56. Group Discussion	- Dood kooxeed
57. Guide	- Tilmaamid - Hage
58. Hand Book	- Tilmaan Bixiye - Tilmaame Bare
59. Human Resources	- Khayraadka Dadka
60. Human Settlement	- Degsiimooyinka Aadanaha - Degaamayn
61. Implementation	- Hirgalin - Fulin
62. Information	- Xog - Wargelin
63. Institution	- Haya'ad
64. Institution Builder	- Haya'ad Dhise
65. Institutionalise	- Haya'deeye
66. Instruction	- Amar - Wax barasho - Wax barid
67. Key Point	- Qoddobbo Muhiim ah. - Qoddobbo Ma Dhaafaan ah
68. Leadership Process	- Geedi socod Hoggaamineed
69. Learning	- Barasho - Wax Barasho - Tacliin Barasho
70. Learning Objective	- Ujeeddooyinka Barashada - Yoolka Barashada
71. Local Government/Authority	- Dawladda Hoose
72. Majority	- Aqlabiyad - Inta Badan
73. Management Process	- Geedi Socodka Maaraynta
74. Meeting	- Kulan - Shir
75. Minority	- Inta Yar - Laga tiro yar yahay
76. Minutes	- Hadal Qor - Hadal qoraal
77. Mission	- Ergo - Risaalo
78. Monitoring	- La socod - La saan qaad

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO
KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

79. Negotiation/Negotiator	- Wada Xaajood siiye - Wada Hadal siiye - Gorgoriye
80. Networking	- Shabakadeyn/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya
81. Organization	- Urur
82. Overseer	- Korjooge
83. Overview	- Dulmar/Guud Mar
84. Participants	- Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaa-sha
85. Perception	- Faham/Dhugmo/Garasho
86. Performance	- Waxqabad/Fulin Hawleed
87. Perspective	- Ka eegid wajio kala duwan
88. Policy	- Qorshe Hawleed/Khidad/Siyaasad
89. Policy Maker	- Siyaasad Dejiye
90. Power Broker	- Awood wax ku qabte/Awood adeegsade
91. Presentation	- Soo Bandhigid/Qadimaad
92. Proactive	- Ka hor dhaaf/Qorshe Curiye/Qorshe raac
93. Process	- Geedi socod/Socodka
94. Questionnaire	- Weydiimo Qoran/weydiimo taxane ah/ weydiimo Sahan ah
95. Quorum	- Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo
96. Rational	- Maan-gal/Macquul
97. Reactive	- Falcelin/Qorshe laawe/Arrin ku baraa-rug
98. Reference	- Tixraac/Raad raac
99. Reflection	- Ilays noqod/Humaag noqod
100. Resources	- Khayraad
101. Revenue	- Dakhli
102. Role play	- Door-jelid/Door ciyaarid
103. Session	- Fadhi/Kulan
104. Shared Vision	- Aragti wadaag
105. Simple Majority	- Aqlabiyad hal dheeri ah
106. Simulation	- Iska yeelid/U ekeysiiin
107. Slums	- Buul caws/Carshaan/Isku raran
108. Solution	- Furdaamin/Xal
109. Stakeholders	- Daneeyayaal
110. Strategic Plan	- Qorshe istaratijiyadeed
111. Strategy	- Istaratijiyad/Tab/xeelad
112. Summary	- Soo koobid/Khulaaso
113. Symptoms	- Astaamo/ Calaamado
114. Systematic	- Habaysan/Nidaamsan
115. Technique	- Farsamo/Xeelad

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO
KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

116. Training Design	- Jaanjooyada Tababarka/Naqshadeynta Tababarka
117. Training Material	- Agabka Tababarka/Qalabka Tababarka
118. Training Need Assessment	- Qiyaasid baahida Tababarka/Qiimeynta Baahida Tababarka
119. Transparency	- Wax qaris laa'aan
120. Transparent	- Qof aan waxba qarinnaynin.
121. Unanimous	- Loo dhan yahay/Gedigood
122. Vision	- Aragti fog/Aragti dheer
123. Warm up exercise	- Iskullalayn/Qandhicin/Diiran
124. Workshop	- Aqoon Isweydaarsi
Priority two words	
125. Acknowledgment	- Garwaaqsi/Garawsi/Mahad-celin
126. Administrative Fixes	- Adeegsi
127. Analysis	- Gorfeyn/Falanqeyn/Taxliil
128. Assignment	- Shaqo Mucayin ah
129. Assumption	- Maleyn/Si u qaadasho
130. Benchmark	- Bar qiyaaseed/Bartilmameed
131. Challenges	- Caqabad/Loolan/Hardan
132. Collective	- Kooxeed/Urureed/Wadareed
133. Conceptual frame work	- Gadaan-fikradeed/Aasaas fik
134. Constructive	- Wax dhisid/Dhismo-gal
135. Conventional Wisdom	- Xikmad soo jireen ah
136. Corruption	- Musuq-maasuq/Laaluush.
137. Dilemma	- Laba daran mid dooro
138. Diversity	- Kala duwanaa/Kala gedisnaa
139. Encouraging	- Dhiiri-galin/Geesinimo galin
140. Fundamental	- Asal/Aasaasi
141. Identification	- Tilmaamid/Baadi sooc/Aqoonsi
142. Individual Contribution.	- Gacan ka geysi qofnimo/In qof biiri
143. Infrastructure	- Dhismo-hooseed.
144. Input	- Wax galin
145. Insight.	- Aragti Maskaxeed
146. Inspiration	- Maan-godlin/Ra'yi fiican helid
147. Interaction	- Isdhex-gal/isla fal-gal/Isku dhafmid
148. Judgement	- Xukun/Go'aan
149. Land Use Malaise	- Aafada dhul boobka/Dhul ku habsa
150. Multipurpose	- Ujeedo badan/Ujeedooyin kala du
151. Output	- Wax ka soo saarid
152. Potential Candidate	- Musharax dihin/Musharax iman kara
153. Pre-training	- Tababar horaad/Tababar hortiiis
154. Priority	- Mudnaan
155. Problem Solver	- Furdaamiye/Xaliye dhib

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO
KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

156. Proficiency	- Xirfad Hanasho/Aqoon sare u leh
157. Public	- Guud
158. Public Sector	- Qaybta Guud
159. Public Service	- Adeeg guud.
160. Regulation	- Xeer Hoosaad.
161. Self Governance	- Isxukumid.
162. Self Introduction	- Is-sheegid/Is-tilmaamid
163. Self study	- Isbarid
164. Self Assessment	- Isqiyaasid/Isqiimeyn
165. Shrinking Resources	- Khayraadka sii yaranaya
166. Technical	- Farsamo/Farsamayn
167. Training needs	- Baahi tababar
Priority three Words	
168. Absolute Poverty	- Saboolnimo
169. Absolute	- Gebi-ahaan/Buuxda
170. Application Commitments	- Nidar-gal/Daba-qaad ballan
171. Bureaucracies	- Biroqraadiyad/Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay
172. Caution	- Taxadar/Digniin
173. Density	- Cufnaan/Jirmiga shega
174. Environmental Degradation	- Hoos u dhac degaan/Hoos u dhac xaaladda degaanka
175. Equilibrium	- Dheeli-tir/Is-le'eg
176. Hawker	- Ha is wareerin/Dadka badeecada naadiya
177. Implication	- Maldahnaan/Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka
178. Jurisdiction.	- Haya'addaha Garsoorka
179. Legal Requirement	- Baahida Sharciyeed
180. Legislation	- Xeer Degin
181. Legitimate	- Sharci ahaan/Qaanuun ahaan
182. Matchmaker	- Isku aadiye wax isku habboon
183. Misinterpretation	- Fasiraad xumo/Fasiraad qaldan
184. Off-spring	- Farac
185. Optimistic	- Samo-filasho/Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg
186. Partnership	- Wadaag/Wada lahaansho
187. Pessimistic	- Xumo arag/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg
188. Phenomena	- Ifafaalayaal
189. Professional	- Xirfadle/Xeel-dheeri
190. Recycle	- Sameyn celin/Dib u nacfi galin
191. Rules	- Qawaaniin/Xeer

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO
KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

192. Status Quo	- Xaalad taagan
193. Stimulation	- Xiiso galin/Fi-fircooni galin
194. To Wear Different Hats	- Xilqaad badnaan/Kaalimokala duwan qaa
195. Water Pollution	- Dikhaw Biyood/Wasakhaw Biyood/Dhiiq
196. Facilitator	- Fududeeye
197. Financier	- Masuul Maaliyadeed
198. Gender	- Jandar
199. Negotiator	- Wada hadal siye
200. Overseer	- Korjooge
201. Policy Maker	- Siyaasad dejiye
202. Power Broker	- Awood wax ku Qabte
203. Institution Builder	- Haya'ad dhise
204. Leader	- Hogaamiye
205. Leadership	- Hogaamin

**UN-HABITAT
TRAINING AND CAPACITY BUILDING BRANCH (TCBB)
AND REGIONAL OFFICE FOR AFRICA AND THE ARAB STATES
(ROAAS)**

P.O.Box 30030 GPO Nairobi 00100, Kenya
Telephone: 254-20-623120; Fax: 254-20-624266/7
E-mail: infohabitat@unhabitat.org; Website: <http://www.unhabitat.org>

EUROPEAN COMMISSION